JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD

SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadka 14aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 18/10/2025 |
|---|---|---|



# XEERKA CIIDANKA SOCDAALKA IYO ILLAALINTA XUDUUDAHA JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# XEER LR.109/2025


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


Sannadka 2025

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** | **REPUBLIC OF SOMALILAND** جمهورية صوماليلاند

**Xafiiska Madaxweyne Ku Xigeenka**
**Office Of The Vice President**
نائب الرئيس

Ref:-JSL/XMK/WM/222-177/102025 — Taariikh: 05/10/2025

# Wareegto Madaxwayne

**Dhaqan-galka xeerka Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalinta Xuduudaha Xeer Lr. 109/2025.**

**Markii aan Arkay**: Qodobka **91**aad, Dastuurka jamhuuriyadda Somaliland.

**Markii aan Arkay**: Qodobka **38**aad Faqradiisa **2**aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

**Markii aan Arkay:** Qodobka **75**aad Iyo **76**aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

**Markii aan helay:** Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiilada **(Go'aan Lr; GW/KF-12/18/2025) GW/G/12/407/2025**, Kuna Taariikhaysan **15/09/2025;**

**Waxa aan soo-saaray;**

Wareegtadan lagu faafinayo **Dhaqanka-galka Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha Xeer Lr.109/2025.**

**Allaa Mahad Leh**

XAFIISKA MADAXWAYNE KU-XIGEENKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

**Maxamed Cali Aw Cabdi Madaxeyne ku-xigeenka JSL ahna K/S Madaxweynaha JSL**

## Ujeedo: - Go'aanka Ansaxinta Xeerka Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalinta Xuduudaha Xeer Lr. 109/2025

GOLAHA WAKIILLADU:

**Markuu Arkay: -** Qodobka 8aad Faqraddiisa 3aad, Qodobka 10 aad, Qodobka 15aad Faqraddiisa 4aad, Qodobka 24aad, Qodobka 38aad, Qodobka 77aad, Qodobka 78aad, Qodobka 90aad, Qodobka 124aad ee Dasturka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Arkay: -** Ahmiyadda Ballaadhan ee uu xambaarsan yahay wax beddelka iyo kaabista xeerka ciidanka Socdaalka.

**Markuu Arkay: -** Mabaadii'da caalamiga ah ee la'xidhiidha isu socodka dadka, dalxiiska, maalgashiga iyo shaqo ee ku tilmaaman baaqyada kala duwan ee caalamiga ah iyo kuwa heer goboleed ee la'xidhiidha xaqa isu socodka iyo xidhiidhka dawladaha.

**Markuu Tixgaliyay: -** Soojeedintii Guddida Arrimaha Gudaha, Nabad-gegelyada iyo Difaaca ee Golaha oo ka soo shaqaysay xeerka iyo dooddii mudanayaasha goluhu ka yeesheen xeerka oo ay ka soo baxday wax ka beddelka iyo kaabis in lagu sameeyo qodobada xeerkan Ciidanka Socdaalka.

**Markuu Arkay: -** Go'aanka Ansixinta Wax ka beddelka iyo Kaabista xeerka Ciidanka Socdaalka Iyo Illaalinta Xuduudaha **Xeer. Lr. 109/2025** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnaa **24/05/2025** kalfadhigii **11aad** fadhigiisii **10aad.**

**Markuu Arkay: -** In Golaha Guurtidu wax-ka-bedel iyo kaabis ay ku sameeyeen kuna ansixiyeen konton (50) Cod Wax Ka Beddelka Iyo Kaabista Xeerka Socdaalka iyo Illaalinta xuduudaha **Xeer Lr. 109/2025** Kuna tariikhaynaa **15//06/2025.**

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **31 cod oo** gacan taag ah ku ansaxiyay Wax Ka Beddelka Iyo Kaabista Xeerka Socdaalka iyo Illaalinta xuduudaha **Xeer Lr. 109/2025.**

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

**Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

GOLAHA WAKIILADA
GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADU

*Markuu Arkay:-* Qodobka 8aad Faqraddiisa 3aad, Qodobka 10aad, Qodobka 15aad Faqraddiisa 4aad, Qodobka 24aad, Qodobka 38aad, Qodobka 77aad, Qodobka 78aad, Qodobka 90aad, Qodobka 124aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

*Markuu Arkay:-* Ahmiyadda ballaadhan ee uu xambaarsan yahay wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Socdaalka.

*Markuu Arkay:-* Mabaadii'da caalamiga ah ee la'xidhiidha isu socodka dadka, dalxiiska, maalgashiga iyo shaqo ee ku tilmaaman baaqyada kala duwan ee caalamiga ah iyo kuwa heer goboleed ee la'xidhiidha xaqa isu socodka iyo xidhiidhka dawladaha.

*Markuu Tixgaliyay* Soojeedintii Guddida Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ee Golaha oo ka soo shaqaysay xeerka iyo dooddii mudanayaasha Goluhu ka yeesheen xeerka oo ay ka soo baxday wax ka beddel iyo kaabis in lagu sameeyo qodobbada xeerkan Ciidanka Socdaalka.

*Markuu u codeeyay* Wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Socdaalka Ilaalinta Xuduudaha Xeer Lr. 109/2025 **fadhigii 10aad ee kalfadhiga 11aad** taariikhdu markay ahayd **10 May 2025.**

*Markuu u codeeyay* Wax ka badelka iyo kaabista Golaha Guurtida ee Xeerka Ciidanka Socdaalka Ilaalinta Xuduudaha Xeer Lr. 109/2025 **Fadhigii 16aad ee Kal-fadhigii 12aad** taariikhduna ahayd **01 September 2025.**

## WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN

Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Illaalinta Xuduudaha
**Xeer Lr. 109/2025**

# CUTUBKA 1AAD
# QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabayaa **"Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Illaalinta Xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 109/2025**

## Qodobka 2aad
## Erey bixin

| | |
|---|---|
| **Ajanabi:-** | Waxa loola jeedaa qof kasta oo aan ahayn muwaaddin u dhashay JSL. |
| **Badmaax:-** | Waxa loola jeedaa qof kasta oo leh xirfadda quusidda ama aqoonta badda. |
| **Buugga Badmaaxa:-** | Waxa loola jeedaa dhukumantiga socdaal ee la siiyo dadka ka shaqeeya gaadiidka badaha. |
| **Ciidan:-** | Waxa loola jeedaa Ciidanka Socdaalka JSL. |
| **Dastuur:-** | Waxa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Deggennaansho: -** | Waxa looga jeedaa ruqsad qof la siiyo si uu si sharci ah ugu noolaado gudaha Somaliland. |
| **Foojarigarayn: -** | Waxa looga jeedaa samaynta ama beddelidda sida (waraaqo, dhukumanti, calaamado, aqoonsiyo IWM). |
| **Haystaha:-** | Waxa loola jeedaa qofka iska leh baasaaboorka ama Warqadda Socdaalka. |
| **Madaxweyne:-** | Waxa loola jeedaa Madaxweynaha JSL. |
| **Rafcaan:-** | Waxa loola jeedaa tallaabada qofka ku qanci waaya go'aan ku lid ah uu cabasho ugu gudbinaayo Maxkamadda Sare ama hay'ad kale oo awood u leh arrinkiisa. |
| **Sabbeeye:-** | Waxa loola jeedaa gaadiidka badda, sida doonni, markab laash IWM. |
| **Sarkaal:-** | Waxa loola jeedaa xubin kasta oo Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha ka mid ah oo gaadha darajada xiddigle iyo wixii ka sarreeya. |
| **Sarkaal Xigeen:-** | Waxa loola jeedaa xubin kasta oo Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha ka tirsan oo gaadhay darajada u dhaxeysa laba alifle illáa saddex xadhigle. |
| **Taliye:-** | Waxa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha JSL |
| **Taliye Kuxigeen:-** | Waxa loola jeedaa Taliye Kuxigeenka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha JSL |
| **Wasiir:-** | Waxa loola jeedaa Wasiirka Arrimaha Gudaha JSL. |
| **Xeer:-** | Waxa loola jeedaa Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha JSL |
| **Xuquuq:-** | Waxa loola jeedaa xaqa qof kasta oo sifo sharci ah dalka ku joogaa uu leeyahay. |
| **Kafaalad:-** | Waxa loola jeeda waa wakiil |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA — FAAFINTA BAAHINTA — OFFICIAL GAZETTE — SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Ajuuro:-** Waxa loola jeedaa cashuurta yar ee laga qaado dadka socdaalka

**Deggennaanshiiyo:-** Waxa loola jeeda deggennaanshiiyo rasmi ah

## Qodobka 3aad

## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkan waxa ka mid ah: -

1. In uu dejiyo hannaan sharci oo lagu maamulo dhammaan arrimaha socdaalka ee Jamhuuriyadda Somaliland.
2. **In la illaaliyo Madaxbannaanida iyo ammaanka Qaranka Somaliland**
3. Iyadoo laga duulayo mabaadii'da lagu xusay Qodobka 4aad ee xeerkan, ujeeddooyinka xeerkani xambaarsan yahay waxaa ka mid ah:-
    b) In la helo xayndaab sharci oo sugaya nidaamka ay Somaliland go'aanka uga gaadhayso dadka ajanebiga ah ee dalka soo galaya ama ka baxaya.
    t) In la helo xeer lagu maareeyo shaqaalaha ajaanibka ah ee dalka ku sugan iyo kuwa u imanaya sababo shaqo, si loo ilaaliyo xuquuqdooda.
    **j) In la helo hannaan sharci oo lagu maamulo arrimaha socdaalka ee ajaanibka jooga dalka iyo cid kasta oo sifo sharciya dalka ku soo galaysa ama ka baxaysa.**
    x) In la helo xeer ilaalinaya waajibaadka saaran dadka ajaanibka ah ee dalka ku nool.

## Qodobka 4aad

## Mabaadii'da iyo Gundhigga Xeerka

1. Iyadoo laga duullayo mabaadi'ida guud ee dhawrsanaanta xuquuqda aadamiga ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, waxa kale oo xeerkan gundhig u ah baaqyada caalamiga ah ee la xidhiidha arrimaha socdaalka.
2. Si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa kale oo mabaadii'da ka mid ah:-
    b. Takoor la'aan ama faquuq la'aan (Non-discrimination)
    t. Dhawrsanaanta arrimaha socdaalka iyo xogta dadka (Confidentiality)
    j. Reebanaanta dib u celinta qasabka ah (non-refoulement) ajaanibku marka ay yihiin kuwo bartilmaameed u ah cid kale ama dawlad dhib u gaysanaysa.
    x. Sarraynta sharciga iyo habdhaqanka dawladnimo.
    kh. Iskaashiga caalamiga ah ee ha'yadaha socdaalka Qaramada Midoobay (IOM).
3. Iyadoo faqradda 2aad ee qodobkani sideeda ahaanayso, Jamhuuriyadda Somaliland waxay dib u celin kartaa dambiile ama eedaysane dalkiisa ka soo cararay si waafaqsan Qodobka 35aad Faqraddiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland iyo Xeerka Wareejinta Maxaabiista Xeer Lr. 53/2012.

## Qodobka 5aad

## Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa loona addeegsanayaa: -

1. Qof kasta oo ajnebi ah oo doonaya inuu yimaaddo ama soo galo dalka ama ka baxo iyadoo aan tixgelin la siinayn ujeeddada uu imanayo.
2. Cid kasta oo xeerku xaq u siiyay in lagu dabbaqo ama qayb ka ah fulinta xeerkan.

3. Iyadoo faqradaha hore ee qodobkani ay sidooda ahaanayaan, xeerkan waxa lagu maamulayaa dhammaan arrimaha la xidhiidha socdaalka.
4. Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan shirkadaha iyo shaqsiyaadka iyo cid kasta oo si uun ugu lug leh iyo wax kasta oo khuseeya arrimaha socdaalka ee dhulka Jamhuuriyadda Somalilad.

## CUTUBK 2AAD
## DHISMAHA CIIDANKA SOCDAALKA

### Qodobka 6aad
### Aasaasidda Ciidanka Socdaalka

1. Xeerkan waxa lagu aasaasay Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Ciidanka Socdaalku waa qayb ka mid ah ciidamada sharci fulinta ee Jamhuuriyadda Somaliland.
3. Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalada Xuduuduhu wuxuu xilkooda iyo waajibaadkooda u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka, xeerkan iyo shuruucda kale ee khuseeya hawlahooda shaqo.
4. In uu ka qayb qaato difaaca dalka xaaladaha dagaalka iyo xaaladaha degdegga ah isagoo gacan ka siinaya Ciidanka Qaranka, si'waafaqsan Dastuurka JSL.
5. Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalada Xuduuduhu waxa uu hoostagaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana uu yeelanayaa madaxbannaanidiisa maamul, miisaaniyadeed iyo gudasho hawleedkiisa.

### Qodobka 7aad
### Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Ciidanka Socdaalka

1. Ciidanka Socdaalka **Iyo Ilaalinta Xuduudaha** ee Somaliland waxa uu noqonayaa hay'ad dawladeed oo leh shaqsiyad qaanuuni ah oo u gaar ah, isagoo yeelanaya magaciisa, astaan, xeerhoosaadyo iyo qaabdhismeed u gaar ah, si waafaqsan xeerkan.
2. Waa la dacwayn karaa Ciidanka Socdaalka, iyaguna way dacwoon karaan, dacwadaha maamuul iyo madani waxa ka kaalmaynaya **Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda.**

### Qodobka 8aad
### Astaanta Ciidanka Socdaalka

Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalada Xuduuduhu wuxuu yeelanayaa astaan u gaar ah oo ka kooban sidan:
-
1. Qoraal wareegsan oo uu ku qoran yahay magaca Ciidanka Socdaalka oo dhammaystiran.
2. Gorgor ku taagan magaca Wasaaradda Arrimaha Guddaha, dhexdana ay kaga qoran tahay JSL oo loo soo gaabiyay magaca Jamhuuriyadda Somaliland.
3. Astaanta Ciidanka Socdaalku waa in ay ka muuqataa direyskooda, **shaambaddooda** maamul, aqoonsigooda iyo waxkasta oo u gaar ah Ciidanka, sida faylasha, kaadhadhka aqoonsiga, dhiganayaasha keydsan iyo waxyaabaha kale ee ciidanka u gaarka ah.
4. **Midabka astaanta ciidanka socdaalku waa gorgor leh midab bunni khafiif ah iyo bunni rasiin ah iyo wareega qoraalka oo ah caddaan iyo halka oo danbe madow.**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 9aad

## Xarunta Taliska Ciidanka Socdaalka iyo Xarumo Gobolleedyo

1. Xarunta Dhexe ee hoggaaminta Ciidanka Socdaalku waa caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland ee Hargeysa.
2. Ciidanka Socdaalku wuxuu yeelanayaa xarumo laga maamulo gobollada, degmooyinka iyo xarumo ka dhisan xuduudaha dalka ee madaarrada, xeebaha iyo dhulka Somaliland.

## Qodobka 10aad

## Qaabdhismeedka Ciidanka Socdaalka

Qaabdhismeedka Ciidanka Socdaalka Somaliland waxa uu ka kooban yahay:-

1. Taliska Ciidanka Socdaalka oo ka kooban :-
   b. Taliye
   t. Taliye Kuxigeen
   j. Hoggaanno
   **x. Laamo iyo waaxo hoostaga taliyaha**
   kh. Xarumo iyo rugo ama goobo
   d. Bar kaantarool ama goob socdaal.

## Qodobka 11aad

## Dirayska Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha

1. Dirayska Ciidanka Socdaalku waxa uu noqonayaa:-

   **b.** Surwaal midabkiisu yahay madaw buluug maaray ah (Madaw iyo buluug isku jira) iyo shaadh buluug rasiin ah oo garbaha madaw, kuna taallo gacantiisa bidix astaanta ciidanka iyo kabo madaw oo buudh (qadh) ah iyo koofiyad buluug maaray ah, xadhigga gacanta ama siidhiga oo buluug maaray ah iyo suunka surwaalka ee ciidanka oo buluug maaray ah.

   **t. Tuute buluug (blue) maarey ah (Navy) oo leh astaanta ciidanka socdaalka iyo kabo madaw oo buudh ah ama qadh ah, koofiyad buluug (blue) maarey ah iyo suunka surwaalka ee ciidanka oo madow**

   j. Saraakiisha iyo sarkaal xigeennadu waxay qaadan karaan koofiyadda adag (Cap).

## Qodobka 12aad

## Isgaadhsiinta Ciidanka Socdaalka

1) Si kor loogu qaado shaqada baaxadda leh ee Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha Somaliland, waa inuu abuuro oo hirgeliyo xarumaha isgaadhsiinta ee loogu talagalay xidhiidhka xarumaha iyo baraha ciidanka iyo xidhiidhka ciidanka iyo hay'adaha kale ee qaranka.
2) Xarumaha isgaadhsiinta ee ku xusan faqradda hore ee qodobkan waxa uu ciidanku u adeegsanayaa: -
   b. Xidhiidhka ciidanka gudihiisa, ciidamada kale ee qaranka iyo hay'adaha kale ee ay shaqo wadaagga yihiin.
   t. Dhammaan xidhiidhada kale ee la xidhiidha hawlaha shaqo ee Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha Somaliland.
3) **Waxay Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalada Xuduuduhu abuurayaan keydka xogaha dhaqdhaqaaqa socotada ajaanibka, xogta magangaliyo doonka iyo qaxoontiga.**

## Qodobka 13aad

## Awoodda iyo Waajibaadka Ciidanka Socdaalka Somaliland

Ciidanka Socdaalka waxa ka mid ah waajibaadkooda:-

1. Maamulidda iyo maareynta arrimaha la'xidhiidha soo gelidda, ka bixidda, joogista ama degidda dalka Jamhuuriyadda Somaliland, si'waafaqsan xeerkan.
2. Hubinta saxnimada warqadaha ama dhukumentiyada qof kasta oo doonaya in uu soo galo ama ka boxo dalka JSL ama doonaya oggolaansho deggennaansho rasmi ah ama oggolaansho joogitaan muddaysan.
3. Soo saarista iyo hubinta dalkugallada, baasaaboorrada iyo dhukumentiyada kale ee socdaalka, iyada oo la hubinayo in dhammaan dhukumentiyadaasi ay waafaqsan yihiin shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah.
4. Bixinta iyo cusboonaysiinta rukhsadaha (oggolaansho) joogitaanka ama deggennaanshaha iyo baabi'inta oggolaanshaha joogitaanka ama deggenaanshaha dadka ajaanibka ah ee ku sugan JSL, si'waafaqsan xeerkan iyo habraacayada Ciidanka Socdaalka.
5. Oggolaanshaha ama ruqsadsiinta lagu sheegay faqradda 4aad ee qodobkan wuxuu noqon karaa warqad, shaambad ama dhejis (Sticker) la saarayo dhukumentiga safarka, iyadoo shaambadda iyo dhejisku ay muujinayaan mid ka mid ah noocyada oggolaanshaha la bixiyey.
6. la socodka dadka ajaanibka ah ee ku sugan gudaha Jamhuuriyadda Somaliland, hubinta sharciyadooda iyo in aanay halis ku ahayn **diinta Islaamka** iyo amniga dalka, sidoo kale qaadista tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee ka dhanka ah kuwa ku xadgudba shuruucda deggennaanshaha.
7. Kormeerka iyo ilaalinta xuduudaha dalka laga soo galo (berriga, badda iyo cirka) iyo ka hortagga isu socodka sharcidarrada ah, iyagoo kaashanaya ciidamada kala duwan ee dalka.
8. Hakinta, haynta iyo dib u celinta qof kasta oo ku soo galaya dhulka jamhuuriyadda Somaliland hab sharci darro ah iyo ka qaadista tallaabada sharci ee ku habboon.
9. Joojinta iyo xaqiijinta qof kasta oo ay u tuhmaan in uu si sharcidarro ah ku joogo dalka, iyagoo sharciga u raacaya, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale.
10. Baadhitaan ku sameeyaan dhukumentiyada socdaalka iyo aqoonsiga ajaanibka deggan ama jooga dalka JSL.
11. Qabashada iyo xidhitaanka ama masaafurinta qof kasta oo si sharcidarro ah ku jooga dalka, kaddib marka sharciga la'waafajiyo.
12. Qabashada iyo baadhitaannada dembiyada la'xidhiidha socdaalka, sida tahriibinta dadka ama helitaanka dhukumentiyo been abuur ah.
13. Xubnaha Ciidanka Socdaalku waxay qaadan karaan hub marka ay fulinayaan hawlo shaqadooda la'xidhiidha oo ay u arkaan lagama maarmaan.
14. Xubnaha Ciidanku waxay mararka qaarkood adeegsan karaan awood, si ay u joojiyaan dadka dalka Sharcidarrada ku soo galaya.
15. Baadhista iyo hakinta gaadiid kasta (mid badeed, berri iyo cireedba) oo ka baxaya ama soo galaya xuduudaha JSL, haddii ay jirto sabab keeni karta in looga shakiyo kuxadgudubka xeerkan, xeerarka kale ee dalka ama halbeegyada caalamiga ah ee khuseeya socdaalka.

## Qodobka 14aad

## Shuruudaha Ku biirista Ciidanka Socdaalka

1. Nidaamka shaqo qorista xubnaha Ciidanka Socdaalka waxa loo raacayaa sidan:
   - b. Xayaysiis ay ciidanku samaynayaan oo daahfuran
   - **t. Qof kasta oo da'diisu ka weyn tahay 20 jir.**

j. Muslim ah kuna dhaqma diinta Islaamka.
x. Muwaaddin dhalad ah oo ka soo jeeda JSL.
kh. Maskax ahaan iyo jidh ahaanba bedqaba.
d. Waa in aanu xukun ciqaabeed ku dhicin saddexdii sannadood ee u dambaysay.
r. Waa inuu ka gudbaa imtixaanka aasaasiga ah ee ay ciidanku ka qaadayaan.

2. Ciidanka Socdaalka waxa la shaqayn karaa khuburo iyo lataliyayaal ku takhasusay hawlaha socdaalka iyo sharciyadaha socdaalka waxaana shaqaalaysiintooda loo raacayaa hab waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda Xeer L.r 97/2022.

## Qodobka 15[aad]
## Tababarka Aasaasiga ah ee Ciidanka Socdaalka

1. Qof kasta oo ka soo gudba imtixaanka qaadashada, waa waajib inuu qaato tababar aasaasi ah oo la jaanqaadaya shaqada ciidanka iyo shuruudaha kale ee looga baahan yahay Ciidanka Socdaalka ee xeerkani waajibinayo.
2. Iyadoo faqradda hore ay sideeda ahaanayso cid kasta oo qaadata ama dhammaysata tababarka aasaasiga ah, waxa uu ka ka mid noqon karaa Ciidanka Socdaalka, kaas oo awood u leh fulinta hawlaha ciidanka.
3. Si waafqasan xeerkan, taliyuhu wuxuu masuul ka yahay diyaarinta hannaan lagu qiimeeyo aqoonta aasaasiga ah ee cid kasta oo loo qaadanayo ka mid noqoshada ciidanka iyo qorshaynta nooc kasta oo ah tababarrada waajibka ah ee loo baahan yahay in la siiyo Ciidanka Socdaalka, muddada ay ku jiraan carbinta ama tijaabada iyo kor u qaadista aqoonta saraakiisha.

## Qodobka 16[aad]
## Derajooyinka iyo kala sarreynta Xubnaha Ciidanka

Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduuduhu waxa uu yeelanayaa derajooyinka soo socda:-

1. Saraakiil Sare: -
   b. Sarreeye Guud
   t. Sarreeye Gaas
   j. Sarreeye Guuto
2. Saraakiil Dhexe: -
   b. Gaashaanle Sare
   t. Gaashaanle Dhexe
   j. Gaashaanle
3. Saraakiil Hoose: -
   b. Dhamme
   t. Laba xiddigle
   j. Xiddigle
4. Saraakiil Xigeenno: -
   b. Saddex Xadhigle
   t. Laba Xadhigle
   j. Xadhigle
   x. Saddex Alifle
   kh. Laba Alifle

5. Askari:-
    b. Alifle
    t. Dable
    x. Jadiid
6. Nidaamka dallacsiinta, derajo dhimista iyo anshax marinta Ciidanka Socdaalka, waxa lagu faahfaahin doona xeernidaamiye wasiir.

**Qodobka 17aad**

**Dhaarta Ciidanka Socdaalka**

Xubin kasta oo ka mid ah Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha Somaliland marka shaqada la qorayo ama loo qaato waxa waajib ah in la dhaariyo, iyadoo la marinaayo dhaarta dastuuriga ah ee ku xusan Qodobka 129aad ee Dastuurka JSL.

**Qodobka 18aad**

**Diwaanka Guud ee Ciidanka Socdaalka**

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Socdaalku waxay yeelanaysaa fayl u gaar ah oo loo sameeyo maalinta la qoro shaqada, iyadoo dhacdo kasta oo noloshiisa ama nolosheeda ciidanimo la xidhiidha lagu keydinayo, sida noocyada shaqo ee uu qabtay, tababarrada uu qaatay, waxbarashada uu helay, dallacaadda, xilka, abaalmarinta, anshaxmarinta, beddelka, hoos u dhigidda, denbiyada uu galay, fasaxyada, xaaladdiisa caafimaad iyo dhacdo kasta oo kale oo ay tahay in la keydiyo, iyadoo faylkaasi yeelanayo lambarka ciidan ee la siiyay maalintii la qoray.
2. Qaabka loo xafidayo, cidda awoodda u leh wax ka bedelkiisa iyo habka lagu ogolaan karo eegistiisa ama nuqul ka heliddiisa waxaa lagu nidaaminayaa Xeernidaamiyayaasha Ciidanka Socdaalka oo uu Wasiirka Arimaha Guduhu soo saaro.

**Qodobka 19aad**

**Dhammaadka Shaqada Xubnaha Ciidanka**

Xubnaha Ciidanka Socdaalka waxay shaqadu ka dhammaanaysaa haddii ay mid ama wax ka badan sabahan soo socdaa ay dhacaan: -

b. Geeri.
t. Marka uu gaadho ama ay gaadho da'da hawlgabka, ee ku xusan xeerka hawlgabka ciidamada.
j. Sababo caafimaad oo aanu shaqadiisa u sii gudan karayn.
x. Iscasilaad rasmi ah isla markaana laga aqbalo.
kh. Sifo sharci shaqada looga saaro ama la eryo.
d. Xukun ciqaab ah oo kama dambays ah oo ay ku riddo Maxkamadda Ciidamadu.

**Qodobka 20aad**

**Hannaanka Anshaxmarinta Saraakiisha Sare ee Ciidanka**

1. Cabasho kasta oo la xidhiidha nooc kasta, fal xadgudub ku ah hannaanka dawladnimo ama waajibaadka shaqo ee Taliyaha iyo Taliye Xigeenka Ciidanka, ha ahaato fal anshax xumo fudud ama culus, waxa loo raacayaa si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
2. Waxaana haddii ay jirto cabasho ka dhan ah taliyaha ama taliye xigeenka Ciidanka Socdaalku marka hore baadhaya guddi anshax oo uu magacaabayo Madaxweynuhu, iyagoo:-
    b. **hubinaya** jiritaanka fal anshaxdarro oo xadgudub ku ah sharciga isla markaana xaddidaya nooca iyo heerka falka.

t. Waxaana haddii ay u caddaato jiritaanka fal anshax xumo ay Madaxweynaha u gudbinayaan natiijada kasoo baxday baadhitaankooda, iyagoo u raacinaya talo soo jeedin ku aaddan tallaabada anshaxmarineed ee ku habboon ee ay tahay in laga qaado cidda ay khusayso.

3. Waxaana Madaxweynuhu, isagoo tixgelinaya talabixinta guddida anshaxa, go'aan u dhigma ka gaadhayaa nooca tallaabada anshaxmarineed ee laga qaadayo cidda ay khusayso.
4. Haddii falka anshax xumo uu noqdo mid culus oo ay ka dhalanayso faldambiyeed gef ku ah Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka, waxa waajib ku ah:-
   - b. Madaxweynaha inuu xilka ka qaado cidda ay khusayso.
   - t. Inuu ku wargeliyo xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee ciidamada, si looga qaado tallaabo sharciga waafaqsan oo u dhiganta falkiisa.

## Qodobka 21aad

## Nidaamka Anshaxmarineed ee Saraakiisha iyo Shaqaalaha Ciidanka Socdaalka

1. Nooc kasta oo cabasho ah oo laga soo gudbiyo xubnaha kala duwan ee Ciidanka Socdaalka, anshaxmarintooda iyo go'aamada kala danbeeya ee laga qaadan karo waxaa lagu faahfaahin doonaa xeernidaamiyaha cabashooyinka iyo anshaxmarinta Ciidanka Socdaalka.
2. Xeernidaamiyaha ku tilmaaman faqradda hore kaddib marka uu la tashado taliyaha Ciidanka Socdaalka waxaa soo saaraya wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## Qodobka 22aad

## Hawlgabka iyo Daryeelka Ciidanka

Xubnaha Ciidanka Socdaalka waxay leeyihiin xuquuq hawlgab iyo xaqsiin haddii ay dhibaato ka soo gaadho waajibka qarannimada ah ee ay gudanayaan si'waafaqsan Xeerka Hawlgabka Iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka Xeer L.r 88/2018.

## Qodobka 23aad

## Mushaharrada iyo Gunnooyinka

Xubin kasta oo ah Ciidanka Socdaalka:-

1. Waxay yeelanaysaa mushahar go'an.
2. Gunno xilleed
3. Heerarka mushaharka iyo gunnooyinka waxa lagu soo saarayaa xeer madaxweyne marka uu la tashado haya'ddaha ay khusayso.
4. In la siiyo mushahar u dhigma shaqada uu hayo.
5. Waxa kale oo uu mutaysan karaa gunno, waxaana lagu faahfaahinayaa xeernidaamiyaha Ciidanka Socdaalka Somaliland.

## Qodobka 24aad

## Abaalmarinta Xubnaha Ciidanka Socdaalka

1. Xubnaha Ciidanka Socdaalka waxa la siin karaa abaalgudyadan soo socda, iyagoo qoraal ah, faylkiisana loo galinayo: -
   - b. Ammaan caadi ah (Af ama qoraal);
   - t. Abaalgud lacageed;
   - j. Abaalgud qiimayn hawleed;
   - x.Billadsharaf ama billadgeesi;
   - kh. Dallacaad abaalmarin gaar ahaaneed;
   - d. Fasax abaalgud;

2. Farqadda 1aad ee qodobkan, abaalgudyadaas cidda bixinaysa iyo qaabka loo bixinaayo abaalmarinta waxa lagu xusayaa xeernidaamiyaha uu xeerkani jidaynayo.

## Qodobka 25aad

## Awooddaha iyo Waajibaadka Taliyaha Ciidanka Socdaalka

1. Taliyuhu waa mas'uulka ugu sarreeya hoggaamintа iyo maamulka Ciidanka Socdaalka, waxaana magacaabaya Madaxweynaha, si waafaqsan Qodobka 90aad faqraddiisa 3aad ee Dastuurka JSL.
2. Taliyaha Ciidanku waxa uu awood u leeyahay: -

b. Iskudubaridka iyo isu xidhka hawlaha shaqo ee Ciidanka iyo hawlgalinta Ciidanka Socdaalka.

t. Diyaarinta qorshayaal lagu horumarinaayo Ciidanka Socdaalka aqoontooda iyo xirfaddooda.

j. Diyaarinta iyo iskudubaridka deddaalo kor loogu qaadayo hawl gudashada ciidanka, iyadoo lagu qalabaynaayo waxyaabaha u fududaynaya hawl gudashadooda sida hellida gaadiid ku filan iyo isgaadhsiin casri ah.

x. Iskudubaridka iyo soojeedinta qorshe dib u eegis loogu samaynayo qaabdhismeedka Ciidanka Socdaalka, marka ay jirto sabab macquul, una gudbinayo Wasiirka Arimaha Gudaha si uu u ansixiyo.

kh. Qorshaynta iyo jaangoynta tirada ciidanka, iyadoo lagu salaynayo hadba baahida jirta.

d. Soojeedinta dallacsiinta iyo derejo dhimista saraakiisha Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaaladda Xuduudaha, isagoo u gudbinaya Madaxweynaha si uu u ansixiyo.

r. Lasocodsiinta xogaha iyo warbixinaha la xidhiidha arrimaha socdaalka iyo ajaanibka dalka ku sugan si joogto ah Wasiirka Arrimaha Gudaha.

s. Abuuridda fursado aqoon korodhsi iyo tababarro lagu horumarinayo, korna loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha ciidanka.

sh. Qabyatirka iyo qalabaynta Ciidanka Socdaalka sida, gaadiidka, isgaadhsiinta IWM iyo inuu hirgaliyo barro caafimaad oo ciidanka u gaar ah.

dh. Ka shaqaynta sidii loo dhisi lahaa Xarumo lagu tababarayo Ciidanka Socdaalka, si loo helo ciidan tayo sare leh oo dhinac walba ka dhisan.

c. Samaynta hannaan dhammaystiran oo lagu maareeyo habka loo qorayo Ciidanka iyo shaqaalaynta, aqoonta iyo tababarrada, labiska dirayska, qaadashada hubka IWM.

g. Magacaabidda guddi qiimayneed.

f. Dalacaadda derajooyinka, wuxuu taliyaha ciidanku awood u leeyahay wixii ka hooseeya xiddigle, isagoo oo ku soo saaraya wareegto.

## Qodobka 26aad

## Waajibaadka iyo Awoodda Taliye Kuxigeenka Ciidanka

1. Taliye kuxigeenka Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaaladda Xuduudaha waxa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, si waafaqsan Qodobka 90aad farqada 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, Waana sarkaalka labaad ee ugu sarreeya xaga darajada iyo maamulkaba Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduudaha.
2. Taliye Ku-xigeenku waxa uu buuxiyaa jagada taliyaha waqtiyada uu ka maqan yahay xafiiska, isagoo qabanaya waajibaadkii iyo masuuliyaddii Taliyaha.
3. Waxa kale oo taliye kuxigeenka fuliyaa waajibaadyada ama hawlaha uu taliyuhu u igmado.

## Qodobka 27aad
## Shuraadaha Magacaabista Taliyaha iyo Kuxigeenka Ciidanka

1. Sarkaalka loo magacaabayo Taliyaha ama Taliye Kuxigeenka Ciidanka Socdaalku waa inuu buuxiyaa shuruudahan: -
   b. Waa inuu yahay muwaaddin dhalad ah (by birth).
   t. Waa inuu muslim yahay, kuna dhaqmo diinta islaamka.
   j. Xilkas yahay, da'diisuna ka yaraan 40 sannadood.
   x. Waa inuu leeyahay aqoon akaademi ciidannimo oo la aqoonsan yahay.
   kh. Waa inuu leeyahay waaya'aragnimo ciidannimo oo aan ka yarayn labaatan sannadood ama wax u dhigma.
   a. Waa inuu leeyahay awood hoggaamineed iyo karti uu ku hanan karo xilkaa loo igmaday.
2. Madaxweynaha ayaa leh awoodda xil ka qaadista Taliyaha iyo Taliye Kuxigeenka.

## Qodobka 28aad
## Awooddaha iyo Doorka Madaxweynaha

1. Madaxweynuhu waa Taliyaha Guud ee ciidamada JSL oo Ciidanka Socdaalkuna ka mid yahay, sida waafaqsan Qodobka 90aad Faqraddiisa 4aad ee Dastuurka JSL.
2. Taliyaha Guud ee Ciiddanka Socdaalka & Kuxigeenkiisa waxa magacaabistooda & xilka qaadistoodaba leh Madaxweynaha JSL.
3. Waxa kale oo awoodda Madaxweynaha ka mid ah hadba hawlaha kale ee xeerkan & xerarka kale awood u siiyeen.
4. Darajooyinka xiddigle iyo wixii ka sarreeya Madaxweynaha ayaa bixinaya.

## Qodobka 29aad
## Doorka Wasaaradda Arrimaha Guddaha ee Ciidanka

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa uu leeyahay waajibaadka ku tilmaaman Xeerka Kala Xadaynta Xukuumadda Iyo Ha'yadaha Madaxabannaan ee Dawladda Xeer L.r 71/2015.
2. Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu kala talinayaa Madaxweynaha magacaabista & xil ka qaadista Taliyaha Ciidanka Socdaalka & Taliye Kuxigeenkiisa isagoo raacaya xeerkan.
3. Soo saarista xeernidaamiyayaasha ka farcamaya xeerkan.
4. Qabyatirka baahida agabka Ciidanka Socdaalka.
5. Soo saarista tilmaamo, hagayaal guud oo lagu fulinayo siyaasadda Qaranka iyo qorshayaasha ammaanka dalka la xidhiidha.
6. La socodka xaaladda nabadgelyo iyo hubinta in ciidanku guud ahaan hawshoodii u gudanayaan si xeerkan iyo Dastuurka waafaqsan.
7. Tayaynta Ciidanka Socdaalka ka dib marka uu Taliyaha Ciidanka la tashado.
8. Diwaan-galinta jaaliyadaha ku sugan dalka, kaddib marka uu helo soojeedinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 30aad
## Waxyaabaha ka reebban Ciidanka Socdaalka

Waxyaabaha ka reeban Xubnaha Ciidanka Socdaalka waxaa ka mid ah: -

1. In dano gaar u ah u isticmaalaan awooddooda, derajadooda iyo haybaddooda ciidannimo.
2. In ay qabtaan shaqo kale oo ka duwan tan ciidanka, muddada ay ciidanka ka tirsan yihiin.
3. Inay kala hortagaan hub noocyadiisa kala duwan ee ciidamada ee Qaranka, Ciidanka Socdaalka gudihiisa ama dadka rayidka ah, marka laga reebo xaaladaha sharcigu oggol yahay.
4. Inay xubin ka noqdaan xisbi ama urur siyaasadeed.
5. Inay bixiyaan xog ama ka warramaan xaalad ciidanku la kulmay ama xubintaasi la kulantay.
6. Inay qaataan hadyad nooca ay doonto ha ahaatee ama wax kasta oo loo siiyo in lagu sharfo si toos ah ama si dadban.
7. Inuu iscasilo marka lagu jiro xaalad dagaal, xaalad degdeg ah ama baadhis ku socoto.
8. Iyo wax kasta oo ka baxsan shaqada ciidannimo oo keeni kara iskhilaaf.

## Qodobka 31aad
## Daryeelka Hantida iyo Qalabka Ciidanka

1. Waxa dhammaan Ciidanka Socdaalka ku Waajib ah Ilaalinta, dayactirka iyo daryeelka hantida iyo qalabka Ciidanka Socdaalka ee uu masuulka ka yahay.
2. Waxaana ciidanku yeelanayaa hannaan lagu maamulo laguna ilaaliyo hantida iyo qalabka ciidanka.
3. Ku xadgudubka ama dayacaadda qalabka ciidanka waxa ka dhalanaysa masuuliyad dembi iyo magdhaw madani.

## Qodobka 32aad
## Hubka & Rasaasta

Dhammaan hubka, qoryaha iyo rasaasta lagu qarameeyo ee lagu diiwaangeliyo xubnaha Ciidanka Socdaalku waxay noqonayaan hubka ciidaanka, dibna looguma celinayo xubinta ciidanka ka tagta ama laga eryo ama hawlgab noqota ama geeriyoota.

## Qodobka 33aad
## Dembiyada ay galaan Ciidanka Socdaalku

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Socdaalka ama hawlwadeennada Ciidanka Socdaalku waxay gali karta dembi ay ka dhalan karto ciqaab, ganaax ama tallaabo anshaxmarineed haddii uu:
   b. Hakiyo ama celiyo muwaaddin Somaliland u dhashay oo sifo sharci ah ku safraya ama ku soo galaya dhulka JSL ayadoon oggolaansho laga haysan maxkamad.
   t. Fududeeyo socdaal ama safar sharci darro ah.
   j. Sii daayo qof amar xayiraad maxkamadeed ka yaal ama la saaray.
   x. Uu qariyo xog la xidhiidha faldambiyeed dhacay ama arrin aan dembi ahayn dembi uga dhigo qof safraya isaga oo ka faa'iidaysanaya awoodda xilka uu hayo.
   kh. Ku tallaabsado musuqmaasuq iyo anshaxxumo lid ku ah xeerkan, xeerarka kale dalka iyo habraacyada iyo siyaasadaha gaarka u ah Ciidanka Socdaalka JSL.
2. Xubnaha, saraakiisha iyo saraakiil xigeennada Ciidanka Socdaalka ee ku kaca faldambiyeedyada faqradda hore ku tilmaaman waxa hannaanka oogista dawcaddooda loo raaci doona si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta iyo xeerarka kale ee dacwaddooda khusaysa.
3. Dhageysiga iyo go'aan ka gaadhista dacwadaha ee faldambiyeedyada ku xusan qodobkan ee lagu soo oogay xubnaha, saraakiisha iyo saraakiil xigeennada Ciidanka Socdaalka waxa awood u leh maxkamadaha ciidamada.

## Qodobka 34aade
## Masuuliyadda Dembiga iyo Ciqaabtiisa

1. Xubnaha Ciidanka Socdaalku waxay masuul ka noqonayaan faldembiyeed kasta oo ay si badheedh ah uga galaan Qaranka, iyadoo loo raacayo xeerarka ciidamada iyo Xeerka Ciqaabta Guud.
2. Waxa dembiyada ay sida badheedhka ah uga galaan dadweynaha loo gudbinayaa Maxkamadda Ciidamada, iyadoo loo raacayo xeerarka ay khusayso.
3. Waxa awood u leh dhagaysiga dacwadaha ciqaabta ah ee lagu soo oogo xubnaha Ciidanka Socdaalka maxkamadaha ciidamada, si waafaqsan Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Xeer L.r 107/2024
4. Haddii uu Taliyaha Qaybtu ama waaxdu u arko in aan falka xubintu gaadhsiisnayn in maxkamad lagu horgeeyo, xubinta waxa lagu anshaxmarinayaa si waafaqsan xeerka anshaxa ciidanka.
5. Xubnaha Ciidanka loo raaci maayo natiijada ka dhalata fal kasta oo ay galaan iyagoo isticmaalaya awoodda xeerku siiyay, marka ay jiraan xaaladaha ku xusan qodobbada Xeerka Ciqaabta Guud.

## Qodobka 35aad
## Masuuliyadda Dacwadaha Madaniga ah

1. Xubin kasta ama sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Socdaalka waxa ku waajib ah inuu sida ugu dhakhsaha badan ugu wargaliyo masuulkiisa waxyeello kasta oo ka dhalata isagoo gudanaya waajibaad shaqo oo uu xilsaarnaa oo uu khasaare ama dhaawac uu ugu gaystay cid kale.
2. Xubinta Ciidanka Socdaalka looma raacyo masuuliyad madani ama magdhaw ka dhashay fal isagoo sharciga ilaalinaya oo gudanaya hawlaha shaqo ee Ciidanka Socdaalka si waafaqsan sharciga.
3. Waxaana masuul ka noqonaysa dawladda magdhaw kasta oo madani oo ka dhashay haddii: -
   b. Falku ku yimid fulinta amar sarkaal ka sarreeya oo awood u leh.
   t. Falku ka dhashay gudashada shaqadiisa si kama' ah ama taxadir darro ah.
   J. Magdhawga ama cawil celinta ka dhalatay dembi ciqaab ah oo xubinta ciidanku ku gashay iyadoo shaqadeeda gudanaysa.
   x. Fal kasta oo kale oo Xeerka Madanigu magdhawgeeda ku waajibinayo dawladda.
4. Si waafaqsan Xeerkan iyo Xeerarka kale ee dalka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxa ku waajib ah inay magdhawdo khasaaraha ama dhaawaca cid (natural and legal persons) soo gaadhay ee ka dhashay tallaabo uu qaaday xubin ama sarkaal Ciidanka Socdaalka ah, isagoo gudanaya ama ku gudo jira gudashada waajibaad shaqo oo uu u xilsaarnaa.
5. Ciidanka Socdaalku kama noqonayaan masuul waxyeelada soo gaadhay qof sifo sharci ah loo hayay ama loo qabanayay haddii: -
   b. Falka ay xubinta ama sarkaalka Ciidanka Socdaalka ahi ka dhashay ka hortag baxsasho ama joojin baxsasho.
   t. Qofku adeegsanayay hub la mid ah ka uu ciidanku sitay isla markaana ciidanku si taxaddir iyo masuuliyadi ku dheehan tahay ula dhaqmay.
6. Iyadoo faqradaha hore ee qodobkani ay sidooda ahaanayaan, masuuliyadda madaniga ah ee ka dhan ah ciidanka ee u dhaxeeya cid kale iyo ciidanka waxa loo raacayaa Xeerka Madaniga iyo xeerarka kale ee dalka.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 36aad

## Miisaaniyadda iyo Maamulka Xisaabaadka Ciidanka Socdaalka

1. Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduuduhu waxa uu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah oo uu isticmaalkeeda iyo adeegsigeeda u madaxbannaan yahay.
2. Miisaaniyadda Ciidanka Socdaalka waxa loo maamulayaa si'waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer L.r 75/2015 xisaabaadka dawladda, xeernidaamiyaha ciidanka iyo habraacyada lagu soo saaro si'waafaqsan xeerkan.
3. Waxa masuul ka ah isticmaalka, ilaalinta, kormeerka iyo dabagalka habsami u socodka maamulka misaaniyadda Ciidanka Socdaalka Taliyaha Ciidanka iyo saraakiisha uu u igmado.
4. Hantidhawraha Guud ee qaranku waxa uu wood u leeyahay nidaamka baadhista maaliyadda **Ciidamada kala duwan ee Dalka** si waafaqsan xeerka hantidhawraha Guud ee Qaranka Xeer L.r 76/2015.
5. In misaaniyadda ciidanka lagu daro khidmadaha uu ka helo adeegyada u qabto ciidanka socdaalku.
6. Ciidanka Socdaalku waxay yeelan karaan hantidhawr gudaha ah, si kor loogu qaado hannaanka maamul wanaagga maaliyadda Ciidanka Socdaalka.

# CUTUBKA 3AAD
# MAAMULKA HAWLAHA SOCDAALKA DALKA

## Qodobka 37aad

## Imaatinka iyo Joogitaanka Dalka ee Ajaanibka

1. Dhammaan hawlaha la xidhiidha imaatinka iyo joogitaanka ee ajaanibka soo galaaya Somaliland waxaa awood u leh **Wasiirka Arrimaha Gudaha**, waxaana wasiirka uga ah **Wakiil Ciidanka Socdaalka.**
2. Qof kasta oo dalka soo galaya ama ka baxaya waxa ku waajib ah inuu soo horjoogsado sarkaalka socdaalka, si uu u waraysto una hubiyo dhukumentigiisa.

## Qodobka 38aad

## Awoodda Oggolaanshaha iyo Diidmada Soo Gelidda Dalka

Iyadoon waxba loo dhimayn nuxurka uu sheegayo qodobka hore waxay hawlwadeennada Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalada Xuduuduhu awood buuxda u leeyihiin: -

**1) Xaqiijinta ujeeddada safarka iyo qiimaynta khatarta qofka**

Ciidanka Socdaalku waxa uu xaq u leeyahay in uu qof kasta oo dalka soo galaya weydiiyo wax kasta oo uu u arko inay muhiim u tahay waafqasanaanta sharciga, xaqiijinta iyo qiimaynta codsadaha.

**2) Oggolaanshaha soo gelidda dalka**

Ciidanka Socdaalku waxa uu xaq u leedahay:

b) In uu bixiyo fiisaha (visa) dadka ajaanibta ah ee doonaya inay galaan dalka JSL.
t) In uu hubiyo dhukumentiyada safarka ee muwaaddiniinta iyo ajaanibka.
j) In uu xaddido muddada joogitaanka qofka ajnabiga ah ee dalka gudihiisa.

**2. Diidmadda soo gelidda dalka**

Ciidanka Socdaalku waxa uu awood buuxda u leeyay in uu u diido oggolaanshaha qof:

b) Leh taariikh dambiyeed culus (argagixiso, dembiyo caalami ah IWM).
t) Aan haysan dhukumentiyo sax ah (baasaaboor, fiise ama oggolaansho kale).
j) Loo arko inuu khatar ku yahay amniga qaranka ama badbaadada bulshada.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE

x) Aan ujeeddada safarkiisu caddayn ama doonaya inuu si sharci darro ah ku joogo.

**Kh) Aanu ka mid ahayn dadka laga feejigan yahay**

## Qodobka 39aad

## Shuruudaha codsiga oggolaanshaha dalkugalka

Qof kasta oo ajnabi ah oo doonaya inuu soo galo dhulka Somaliland, waa in ka hor inta aanu soo galin dalka buuxiyaa Shuruuddahan: -

1) Warqad codsi ah oo dhammaystiran, laguna muujiyey nooca iyo sababta codsiga.
2) Baasaaboor ansax ah oo wakhtigiisa uu ay hadhsan tahay ugu yaraan lix bilood ama dhukumenti socdaal oo u dhigma oo uu ku qoran yahay magaciisa oo sax ah oo la siiyay isaga.
3) Laba sawir oo kur ah oo u dhigma shuruudaha baasaaboorka.
4) Warqad caddeyn ah oo ka socota hay'ad, shirkad ama qof gudaha dalka ah, haddii uu ka helay:
   **b.** Warqad martiqaad rasmi ah, haddii uu marti u yahay qof ama hay'ad gudaha dalka ah.
   **t.** Warqad oggolaansho ah oo ka timid jaamacad ama dugsi gudaha JSL.
5) Caddeyn dhaqaale oo muujinaysa in uu isbixin karayo codsaduhu muddada ku xusan codsigiisa.
6) Caddeyn caafimaad oo muujinaysa in codsaduhu ka bed qabo xannuunada faafa.
7) Warqadda dambi la'aanta oo aan taariikhda bixinteedu ka badnayn 20 maalmaado gudahood.
8) Bixinta lacagta codsiga dal-ku-galka oo aan celin lahayn, xitaa haddii loo diido oggolaanshaha.

## Qodobka 40aad

## Noocyada Oggolaanshaha Soo Gelidda

Noocyada Imaatinka ee la oggol yahay waxa ka mid ah:-

b. Imaatin dalxiis **ama booqasho**

T. Imaatin shaqo.

J. Imaatin waxbarasho **ama cilmi baadhis**

X. Imaatin caafimaad.

kh. Imaatin maalgashi iyo ganacsi.

D. Imaatin socdaal **diinta Islaamka ah**

R. Imaatin jidmarid.

S. Imaatin magangalyo siyaasadeed ama bini'aadantinnimo

## Qodobka 41aad

## Habka Oggolaanshaha Imaatinka Aan Rasmiga ahayn

1. Oggolaanshaha imaatinka aan rasmiga ahayn waxa go'aan ka gaadhisteeda leh ciidanka, iyadoo hadba lagu sallaynaayo dalabka codsadaha iyo waafaqsanaanta xeerka.
2. Waxaana lagu siinayaa Dukumenti Waafaqsan Oggolaanshahaas ama aragtida (Visa) oo ogolaanshaha lagu muujinaayo Dukument-ga Socdaalka ee Codsadaha.
3. Oggolaanshaha waxaa kale oo lagu bixin karaa Qaab Shaanbadeed (STAMP) oo Hawl wadeenka Socdaalku ku dhufto Dukument-ga korkiisa.
4. Xaaladan oo kale waa in Shaanbaduhu koobayaan Ogolaanshaha si waafaqsan Xeerkan.
5. Oggolaansha gaarka ah waxa bixin kara Wasiirka Arrimaha Gudaha oo keliya.
6. Waxaana ka reebban qof kasta oo ajnabi ah oo dalka u yimid ama u jooga Oggolaansho aan rasmi ahayn inuu wax shaqo ah ka qabto dalka muddada uu ku sugan yahay, haddii aanay jirin sabab kale oo keeni karta arrinkaas.

7. Waxaa faqradda 6aad ee qodobkan ka reebban cid kasta oo u timid shaqo haba ahaato mid waqtigeedu xaddidan yahay.
8. Waxaana dhammaan oggolaanshaha rasmiga ah awood u leh bixinteeda hawl wadeennada socdaalka.

## Qodobka 42aad
## Oggolaansho u Imaatin Dalxiis

1. Oggolaansho u imaatin dalxiis waxa bixin kara hawlwadeennada socdaalka.
2. Oggolaansho u imaatin dalxiis waxa la siin karaa ajanabi kasta oo doonaya in uu ku yimaaddo dalka Somaliland:
   b. Ujeeddo dalxiis ama
   t. Sabab kasta oo kale oo wakhti muddaysan leh taasoo ay ula muuqato hawlwadeenka socdaalka inay tahay ansax, bixinta oggolaanshaha imaatin dalxiis.
3. Bixinta oggolaansho imaatin dalxiis waxa shardi u ah:-
   b. Haysashada tigidh ah dib u noqosho oo ansax ah ama ajanabigaas muddada Oggolaanshaha joogitaanka Somaliland ee uu codsaday.
   t. Inuu haysto dhalasho dal kale oo uu hasto baasaaboorkeeda.
   j. Oggolaanshaha joogitaan dalxiis haddii aanu shuruudo gaar ah la iman, muddada joogitaanku kama badnaan karto *saddex bilood laga bilaabo maalintii soo gelitaanka.*
   x. Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu kordhin karaa muddada joogitaanka laba jeer, isagoo tixgelinaaya codsi uga yimid qofka danaynaya sii joogista dalka, iyadoo kordhin kastaa u dhiganto *saddex bilood.*
   b. Waa inuu haysto warqad caafimaad
   t. Waa inuu ka haysto warqad dambi la'aan ah dalka uu ka yimi
   j. Waa inuu haysto dhaqaale ku filan inta uu joogo.
   x.Waa inuu haysto ciwaan lagala xidhiidhi karo.
4. Oggolaanshaha joogitaanka ujeeddo dalxiis waxa ay ugu badnaan noqon kartaa muddo aan ka badnayn sagaal bilood oo ka bilaabmaysa taariikhda la siiyay oggolaanshaha.
5. Waxaana ka reebban cid kasta oo dalka ku joogta ujeeddo dalxiis inay wax shaqo ah dalka ka qabato muddada uu joogo, haddii aanu beddelin ujeeddada lagu siiyay Oggolaanshaha.
6. Waxaanu codsan karaa in loo cusboonaysiiyo muddada uu dalka ku joogo dalxiis ahaan, muddo afar iyo toban maalmood ah ka hor dhammaadka muddada hore.

## Qodobka 43aad
## Oggolaansho u imaatin jid mar (Transit)

1. Oggolaanshaha u imaatin jidmar waxaa la siin karaa ajnabiga: -
   b. Qasdigiisu yahay in uu ku yimaaddo Somaliland si uu u sii wato socdaalkiisa meel ka baxsan dalka Somaliland.
   t. Inuu haysto dhukumenti ansax ah ee looga baahan yahay gelitaanka waddanka uu u socdo.
2. Bixinta oggolaanshaha u imaatin jidmar waxa shardi u ah:-
   b. Haysashada tigidh ansax ah oo muujinaaya sii waditaanka socdaalka waddanka uu u jeedo ama dariiq ku habboon sii wadashada socdaalka iyo

t. Haddii la weydiiyo rahan ama damaanad dabooli karta baahidiisa ajanabigaas inta uu ku joogo Somaliland jidmarkaas.

j. Marka laga reebo shuruudaha gaarka ah ee oggolaansha ku imaatinka jidmarka, xaqa soo gelitaanka dhulka Somaliland, si loo sii wato socdaalka ka baxsan dhulka Somaliland, ansixidda muddadu kama badnaan karto **14 maalmood** laga bilaabo maalintii soo gelitaanka, haddii aanay iman markaas awood ka baxsan qofka.

## Qodobka 44[aad]
## Oggolaansho U Imaatin Waxbarasho iyo Cilmibaadhis

1. Oggolaanshaha sabab waxbarasho waa lasiin karaa ajaanibka raba inay ku soo galaan ama ku joogaan dhulka Somaliland ujeeddo ah in uu ka qayb galo koorsooyin waxbarasho iyo tababarro dugsiyo ku yaalla dhulka Somaliland, koorsooyinkaas oo la xaqiijiyay inay ka diiwaangashan yihiin dalka.
2. Waxa kale oo loo oggol yahay ajnabiga booqasho cilmibaadhis iyo aqoon iswaydaarsasho.
3. Bixinta oggolaansho sabab waxbarasho waxa shardi u ah arrimahan: -

    b. Haysashada tigidh ansax ah oo noqosho ah iyo

    t. Rahan ama damaanad dabooli karta quudkiisa ajnabigaas inta uu joogo dhulka Somaliland oo ah ee muddada uu codsaday.

    j. Oggolaansho rasmi ah oo uu ka haysto hay'adda ama cidda ay khusayso.

    x. Waa inuu haysta waraaqaha caafimaadka oo la hubiyo caafimaadkiisa

    kh. Waa inuu haysto warqadda dembi la'aanta ee dalka uu ka imanayo.
4. Shuruudahaas ama qayb ka mid ah waa lagu wareejin karaa madaxda Ciidanka Socdaalka marka laga reebo kooraska waxbarashada iyadoo uu haysto kharash dabooli kara baahidiisa muddada uu ku sugan yahay dhulka Somaliland.
5. Waxaana oggolaanshaha la siinayaa kaddib marka lala tashado Wasaaradda Waxbarashada ee dalka ee ay hubiso, islamarkaana soo jeediso in codsaduhu u qalmo in la siiyo oggolaansho waxbarasho.
6. Ogolaanshaha u imaatin sabab waxbarasho wuxuu bixinayaa xaqa soo gelitaanka ama joogitaanka dhulka muddada waxbarashada ee lagama maarmaanka ah iyada oo ay weheliso shuruudihiii oggolaanshuhu.
7. Waana in muddada joogitaanka ee sabab waxbarasho aanay ka badnayn muddada ay soconayso waxbarashadu.
8. Dalkugalka waxbarasho waxa loo bixin karaa si sannadle ah
9. Waxaana ka reebban inuu qabto shaqo dhammaystiran, iyadoo mar walba tixgelin la siinayo mabaadii'da Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee ku xusan Xeer Lr. 31/2020.

## Qododbka 45[aad]
## Oggolaansho u Imaatin Shaqo

1. Waxaa si waafaqsan xeerkan la siin karaa oggolaansho u imaatin shaqo dalka qofka ajnabiga kaddib marka uu soo dalbado haddii uu buuxiyo shuruudaha xeerku jideeyay.

2. Waana ka hor inta aan la siin oggolaanshaha shaqo qofka ajnabiga ah tixgelin gaar ah la siiyo hawlaha shaqo ee muwaaddiniintu qaban karaan, si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah.
3. Waxaana oggolaanshaha shaqada ee ajnabiga bixinaya hawlwadeennada socdaalka kaddib marka ay helaan dalabka codsadaha.

## Qodobka 46aad
## Hannaanka Dalbashada Oggolaansho Shaqo ee Ajaanibka

1. Qofka ajnabiga ahi waxa uu codsi qoraal ah oo uu ku caddaynayo ujeeddada safarkiisa, kuna dalbanayo inuu dalka u yimaaddo shaqo u soo gudbinayaa hawlwadeennada Socdaalka.
2. Qofka ajaanibka ah ee dalka shaqo u imanayaa: -
   - b. Waa inuu damaanad ka haysto loo shaqeeyaha uu shaqaynayo
   - t. Waa in loo shaqeeyaha dalbaday qofka ajaanibka ah uu haystaa warqadii cashuur la'aanta.
   - j. Waa inuu jiro heshiis mudaysan oo u dhexeeya loo shaqeeyaha iyo qofka ajaanibka ah.
   - x. Waa inuu haysta Waraaqaha Caafimaadka oo la hubiyo Caafimaadkiisa.
   - kh. Waa inuu haysta Warqada dambi la'aanta ee dalka uu ka imanayo.
3. Waxaana Shardi ah inuu soo raaciyo arjigiisa: -
   - b. Nooca Shaqada uu doonayo inuu dalka ka qabto iyo cidda uu u shaqaynayo.
   - t. Nuqul asal ah oo ah heshiiska shaqaalaynta.
4. Waxaana muddada oggolaanshaha shaqo ee ajnabigu ay ku salaysnaan doontaa hadba muddada heshiiska, si waafaqsan xeerka.
5. Iyadoo faqradda hore ee qodobkan ay sideeda ahaanayso waxa muddada ugu badan ee la oggol yahay in qof ajnebi ahi dalka u yimaaddo sababo la xidhiidha shaqo ay noqonaysaa ugu badnaan ***shan sanno.***
6. Waxaana uu dalban karaa in loo cusboonaysiiyo joogitaankiisa muddo **saddex bilood ah ka hor** dhammaadka muddada hore isagoo dalka ku sugan.
7. Haddii qofka ajnabiga ahi uu ka wareego cidii keentay ee uu u shaqaynayay sababtu waxay doonto ha noqotee, waa inuu muddo **bil gudaheed ah** ku wargeliyaa hay'adaha ay khusayso, si go'aan looga gaadho arrinkiisa.

## Qodobka 47aad
## Isbeddelka iyo Dhammaadka Shaqada ee qofka Ajnabiga ah

1. Marka uu qof ajnabi ahi uu joojiyo shaqadda uu ka hayay dalka sabab kasta ha noqotee, loo shaqeeyaha waxaa laga doonayaa in muddo **toddobo (7) cisho gudahood** ah laga bilaabo markii shaqadu joogsatay uu ku ogaysiiyo **Wasaaradda Shaqada, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska** iyo **ciidanka.**
2. Qofka ajnabiga ah ee joojiya shaqadii hore loogu oggollaaday ee uu dalka ka hayay si **dhammaystiran,** waxa waajib ku ah in uu **toddobo (7) maalmood gudahood** laga bilaabo maalintii uu shaqadda joojiyay ku ogeysiiyo **hay'adaha** ay khusayso iyo **ciidanka.**
3. Qofka ajnabiga ah ee dalka shaqo ku haysta oo uu **iskii u leeyahay** ee doonaya inuu u **beddesho** shaqo ka duwan tii hore loogu oggolaaday, waa in uu **qoraal** ahaan ku ogaysiiyaa **hay'adaha** ay

khusayso muddo **toddobo (7) cisho gudahood** ah laga bilaabo maalintii uu shaqada hore joojiyay.

4. Waxa kale oo heshiisyada shaqo ee ajaanibku ku dhammaan karaan sababaha ku xusan **Qodobka 40aad** ee **Xeer Lr.31**/2020.
5. Waxaana loo raacayaa qodobbada la xidhiidha shaqadda ee ajaanibka ee xeerkan iyo kuwa ku jira **cutubka Lixaad (6)** ee **Xeer Lr.31/2020.**
6. Waana in isbeddelka kasta oo ku yimaadda shaqada ajaanibka in muddada xeerka ku xusan lagu wargeliyaa hay'adaha ay khusayso maaddaama nuxur ahaan uu isbeddel ku imanayo xaaladdii uu ku joogay qofka ajnabiga ahi dalka.
7. Fulin la'aanta qodobbada isbeddelka iyo dhammaadka shaqadda ee ajaanibku waxay saamayn karaan oggolaanshaha joogitaanka dalka ee ajaanibka ee lagu siiyay si waafaqsan xeerkan.
8. Haddii uu ajaanibku beddelayo sababta uu u yimid, xirfad ama cidda uu u yimid waa in uu dalka ka baxo, isla markaana isagoo dalka ka maqan mar labaad uu soo dalbado, isagoo raacaya xeerkan
9. Waa in ajinabi kasta oo u jooga dalka sifo shaqo uu soo maro ciidanka socdaalka inta aanu bixin ka hor, si uu u qaato warqadda ogolaanshaha bixitaan (Exit Visa) 7 cisho ka hor xiliga bixitaankiisa, waana in laga hubiyo warqada cadaynta cashuur la'aanta sida uu dhigayo qodobka 9aad xarafkiisa b ee Xeerka Dakhliga Cashuuraha Xeer Lr. 72.2016.

## Qodobka 48aad
## Waajibaadka Saaran Looshaqeeyaha

1. Looshaqeeyaha waxa waajib ka saran yahay:-

   **b.** Inuu la wadaago dhammaan macluumaadka saxda ah ee qofka ajnabiga ah ee dalka u imanaya inuu u shaqeeyo.

   **t.** Inuu hubiyo in aanu dalka khatar ku ahayn, una hoggaansamayo shuruucda dalka iyo xeerarka la xidhiidha socdaalka iyo arrimaha shaqada.

   **j.** Inuu damaanad qaado in haddii qofka ajnabiga ah ee u shaqaynaya uu awoodi waayo inuu iska bixiyo kharashka uu ku noqonayo sababo macquul ah awgood uu bixinayo.

   **x.** Waxa reebban kafiilka iyo dhaqan kasta oo ka soo horjeeda bini'aadantinnimada oo loo shaqeeyayaashu kula dhaqmaan, shaqaalaha ajaanibka ah.

   **Kh. in uu dammaanad qaado hoygiisa, cuntadiisa iyo tigidhkiisa noqosho.**

   **D. Looshaqeeyuhu kuma wareejin karo shaqaalaha ajaanibka ah cid kale si toos ah iyo si dadban.**

   **R. Waa in loo shaqeeyuhu keenaa shaqalaha ajaanibka ee waddanka ka baxaya ka hor 7 cisho bixitaankooda, si waafaqsan qodobka Qodobka 47aad.**

   **S. Waxaa waajib ku ah looshaqeeyaha in uu bixiyo ganaxaa muddo dhaafka ajinabiga.**

## Qodobka 49aad
## Oggolaansho Joogitaan Muddaysan (Temporary Residence)

Xaqa soo gelitaanka iyo joogitaanka muddaysan waxa la siin karaa ajnabi kasta, marka laga reebo ajnabiga aan la doonayn, haddii uu la yimaaddo shuruudahan soo socda: -

1. Oggolaansho joogitaan Muddaysan waxa la siin karaa qof kasta oo ajnabi ah oo soo dalbada haddii aanu ka mid ahayn kuwa lagu sheegay Qodobka 58aad ee Xeerka.



OFFICIAL GAZETTE

**2.** Oggolaansho joogitaan muddaysan waxa la bixin karaa marka: -

b. Codsaduhu si rasmi ah u soo dalbado oo uu buuxiyo dhammaan shuruudaha xeerkani waajibiyay.

t. Waxaana bixin kara hawlwadeennada socdaalka kaddib marka ay helaan amarka oggolaanshaha Taliyaha.

**3.** Waxaana oggolaanshaha joogitaan muddaysan la siinayaa marka uu: -

b. Damaanad rasmi ah la yimaaddo qofkaas danaynaya, amase qof kale isaga magaciisa, isaga oo usoo gudbinayaa hawlwadeenka socdaalka ee awoodda u leh qiyaasta kharashka ku baxaya muddada uu joogo.

t. Madaxa xafiiska socdaalkuna caddeeyo inay tahay mid ku filan (tigidh) dib ugu noqosho ah dhulkiisa.

j. Waxa Madaxa xafiiska socdaalku awood u leeyahay inuu weydiiyo tigidh uu ku tago waddanka ugu dhow oo loo oggol yahay inuu galo iyo qadar Lacag ah oo aan ka badnayn **25%** ama;

x. Inuu keeno damaanad hal ama ka badan oo dad deggen dhulka Somaliland oo u caddeeya madaxa xafiiska socdaalka inay bixin karaan damaanad u dhiganta qaddarka loo baahan yahay.

**4.** Wasiirka Arrimaha Guduhu markuu dhagaysto madaxda xafiiska socdaalka kaddib wuxuu ka dhaafi karaa ajnabiga soo dalbaday oggolaanshaha joogitaanka muddaysan shardiga ku xusan qodobkan faqraddiisa 3aad xarafkiisa (j) kaddib marka ay u caddaato in: -

b. Ajnabigaasi haysto dariiqooyin kale oo uu ku dabooli karo quudkiisa inta uu joogo dalka muddada oggolaanshaha;

t. Inuu dabooli karo tigidhkiisa dib u noqoshada ama mid uu ugu gudbi karo dal kale oo loo oggol yahay.

**5.** Oggolaanshaha joogitaanka aan rasmiga ahayn waa in lagu tilmaamaa muddada uu joogayo ajnabigu waddanka.

**6.** Ajnabiga haysta oggolaanshaha joogitaanka muddaysan kama qaban karo hawl lagu helaayo faa'iido waddanka gudihiisa, haddii aanu haysan oggolaansho sida uu qabo xeerkani.

**7.** Muddada oggolaanshaha joogitaanka muddaysan kama badnaan karto (3) Saddex sannadood ah.

## Qodobka 50aad
## Deggenaansho Rasmi ah

1. Oggolaanshaha joogitaanka ama deggenaansho rasmi ah waa la siin karaa qof kasta oo ajnabi ah, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
2. Waxaana soo saaraya oo bixinayaa **hawlwadeennada Ciidanka Socdaalka,** kaddib markay **la tashadaan** Wasiirka Arrimaha Gudaha.
3. Oggolaanshuhu wuu dhacayaa ama buriyaa haddii: -

   b. Daneeyuhu ka maqnaado dalka Somaliland, muddo ka badan hal sanno oo xidhiidh ah

   t. Muddada joogitaanka rasmiga ahi waa afar sanno oo hal mar loo kordhin karo.
4. Waxaana qofka ajnabiga ah la siinayaa shahaado caddaynaysa oggolaanshaha degennaansho rasmi ah.
5. Lammaanaha isqaba iyo carruurtooda **ka yar 15 jir** ee la nool ajnabiga la siiyey oggolaanshaha degennaanshaha ama joogitaanka rasmiga ah waxaa lagu dhaqayaa qodobbada xeerka.

6. Habka iyo hannaanka ay u dalbanayaan dadka ajanabiga ahi deggennaanshaha rasmiga ah waxa **taliyaha ciidanku** ku soo saarayaa **habraac** waafaqsan xeerkan.

**Qodobka 51aad**
**Shuruudaha Deggenaanshaha Rasmiga ah**

1. Ogolaanshaha joogitaanka ama deggaanaanshaha rasmiga ah waa la siin karaa maalgashade, ajaanib leh xirfad/aqoon sare iyo ajaanibka qaba gabadh muwaaddin ah.
   b. Sifo sharci ah u joogo si xidhiidh ah dhulka Somaliland, muddo aan ka yarayn shan (5) sanno oo ka bilaabmaysa marka la aqoonsado dalka JSL.
   t. Buuxiyay dhammaan shuruudaha kale ee xeerku jideeyay.
   j. Ku sifoobay akhlaaq iyo dhaqan wanaag isla markaana si buuxda ugu hoggansamay shuruucda dalka.
   x. Bixiyay dhammaan noocyada kala duwan ee cashuuraha ee ku waajibay.
   kh. Aanu gelin dembi ciqaabtiisu ka badan tahay hal (1) sanno, kagana hor caddaaday maxkamad awood u leh.

**Qodobka 52aad**
**Deggenaanshaha ama Joogitaanka Ku Meel gaadhka ah**

1. Deggenaanshaha ama joogitaanka ku meel gaadhka ah waxa bixinaya **ciidanka,** kaddib marka uu helo codsiga daneeyaha.
2. Waxaana la bixinayaa kaddib marka la hubiyo jiritaanka sababo macquul ah.
3. Waxa ka mid ah sababaha keeni kara oggolaanshaha deggennaanshaha ama joogitaanka ku meel gaadhka arrimahan: -
   b. Sababo shaqo oo rasmi ah oo ay caddaysay Wasaaradda Shaqo-gelintu oo haysto heshiis shaqo oo rasmi ah oo muddadiisu aanay ka yarayn **labo (2) sannadood**, dakhligiisuna yahay mid ku filan.
   t. Sababo caafimaad oo ay xaqiijisay Wasaaradda Horumarinta Caafimaadku.
   j. Sababo qaxoontinnimo oo ay caddaysay Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku (HQBQ) si waafaqsan xeerkan iyo xeerka qaxoontiga.
   x. Sababo ganacsi ama maalgashi oo ay xaqiijiyeen hay'adaha u xilsaarani.
   kh. Sababo waxbarasho oo ay xaqiijisay Wasaaradda Waxbarashadu
4. Qofka ajnabiga ah ee la siinayo deggenaanshaha ama joogitaanka ku meel gaadhka ah waa inuu buuxiyaa shuruudahan: -
   b. Inuu yahay qof ku sifoobay akhlaaq iyo dhaqan wanaag iyo u hoggaansanaanta sharciga muddadii uu dalka ku sugnaa.
   t. Inay jirto sabab ka mid ah sababaha ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan.
   j. In aanu ku dhicin xukun kama dambays ah oo kaga hor caddaaday maxkamad awood u leh.
5. Muddada deggennaanshaha ama joogitaanka ku meel gaadhka ahi waa **saddex (3) sannadood**, iyadoo ka hor **saddex bilood** dhicitaanka muddada hore uu dalban karo in loo cusboonaysiiyo.
6. Waxaana awoodda **cusboonaysiinta** iska leh **Taliyaha.**

## Qodobka 53aad

## Waayidda Deggennaanshaha Rasmiga ah

1. Qofka ajnabiga ahi waxa uu waayi karaa oggolaanshaha degennaanshaha rasmiga ah ee dalka haddii uu: -

   b. Ku kaco fal waxyeeli kara nabad gelyada iyo xasilloonida dalka;

   t. Ka qayb qaato falal liddi ku ah jiritaanka iyo madaxbannaanida JSL.

   j. Ka qayb galo ama sameeyo falal dembi ka ah dalka.

   x. Ku kaco falal amni darro ku ah dalkiisa ama dal kale.

   Kh. Ka maqnaada dalka Somaliland muddo ka badan hal sanno oo xidhiidh ah, si waafaqsan qodobka 50aad.

2. Sababaha kale ee uu ku waayi karo waxa ka mid ah haddii uu: -

   b. Ku dhaco xukun ciqaab ah oo kama dambays ahi muddada **saddexda (3) sannadood** ee u horreeya.

   t. Sifo sharciga baalmarsan uu ku helay oggolaanshaha oo ay ku caddaato.

   j. Si madaxbannaan u dalbado inuu ka laabto oggolaanshaha deggennaanshaha la siisay waddankiisii kaddib marka uu ku qanco inuu ku noolaan karo.

   a. Haddii ay ku caddaato inuu faldambiyeed halis ah ku soo galay meel ka baxsan dhulka Jamhuuriyadda Somaliland, ka hor intaan la aqbalin.

   b. Qaato **dhalashada** Jamhuuriyadda Somaliland si waafaqsan Xeerka Jinsiyadda xeer L.r 22/2002.

## Qodobka 54aad

## Joogitaanka Dadka Aan Lahayn Dal

1. Qof kasta oo aan lahayn dal uu dhalasho ahaan kasoo jeedo oo fursad u heli karin hellida dhalashada dal kale oo dhulka JSL ku joogay oo ku noolaa muddo **10 sannadood** oo xidhiidh ah, waxa uu xaq u yeelanayaa in loo oggolaado joogitaanka iyo deggennaanshaha dalka marka uu soo codsado ee uu buuxiyo shuruudaha si waafaqsan Qodobka 4 (1) ee Xeerka Jinsiyadda xeer L.r 22/2002.
2. Habraaca loo marayo dalbashada deggenaanshaha ee dadka aan dal lahayn, waxa hage faahfaahsan kusoo saaraya **Wasiirka Arrimaha Gudaha.**

## Qodobka 55aad

## Waxyaabaha ka Reebban Ajaanibka

Qof kasta oo ajnabi ah oo sifo sharci loogu oggollaaday joogitaanka dalka waxa ka reebban arrimahan: -

1. Kicin, abaabul, gacansiin qalalaase iyo wax kasta oo waxyeeli kara nabadgelyada bulshada uu la nool yahay iyo waddamada kale ee caalamka.
2. Keenidda, soo dejinta, samaynta, ka ganacsiga hubka iyo waxyaalaha qarxa.
3. Ka qaybqaadashada, caawinta ama gacansiinta iyo dhiirrigalinta argagixisada iyo falal argagixiso.

4. Ku hawlanaanta ama caawinta soo saarista, beerista, sifaynta, dhoofinta, soo dejinta, keydinta, ka ganacsiga, haysashada, isticmaalka ama qaybinta maandooriyaha nooc kasta oo uu yahay.
5. Tahriibinta, gacansiinta iyo fududaynta arrimaha ka ganacsiga dadka.
6. Faafinta diin aan ahayn diinta Islaamka.
7. Fal kasta oo ka dhan ah ama lid ku ah diinta Islaamka iyo dhaqanka suubban ee bulshada uu la nool yahay.
8. Iyo wax kasta oo xeer reebay ama ka reebban qofka muwaaddinka ah.

## Qodobka 56aad
## Laalid ama Kala Noqoshada Oggolaanshaha

1. Ciidanku waxay laali karaan oggolaanshaha qofka ajnabiga ah si waafaqsan xeerkan loo siiyay haddii ay u caddaato: -
   b. Inuu bixiyey xog been ah si uu u helo oggolaanshaha deggenaanshaha dalka.
   t. In aan la dabbaqin waxyaabaha uu waajibiyey xeerkani.
2. Ciidanku wuxuu siin doonaa qofka laga laalay ama lagala noqday oggolaanshaha ka hor intaan wax tallaabo ah laga qaadin **ogeysiin qoraal rasmi ah** iyo fursad uu ku sharraxo arrimihiisa.
3. Xubnaha qofka laga laalay ama lagala noqday waxay xaq u leeyihiin inay si keli keli ah u codsadaan oggolaanshaha deggennaanshaha ama joogitaanka, iyagoo u soo gudbinaya ciidanka muddo **soddon (30) maalmood gudahood ah** si waafaqsan xeerkan.
4. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Ciidanka Socdaalka Iyo Illaalinta Xuduuddaha waxa uu xaq u leeyahay qaadashada rafcaanka muddo 15 cisho ilaa 30 cisho gudahood ah kaga rafcaan qaato go'aanka Ciidanka Socdaalka iyo Illaalinta Xuduuddaha, isla markaana qoraal sababaysan oo uu kaga cabanayo go'aankaas u gudbiyaa Maxkamada sare, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 57aad
## Xuquuqaha iyo Waajibaadka Qofka Ajnabiga

Si waafaqsan Qodobka 8aad faqraddiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland "Ajaanibka dalka Somaliland sharci ku joogaa waxay xeerka hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la siman tan muwaaddiniinta oo ay ka reebban tahay xuquuqda siyaasiga ah ee muwaaddiniinta u gaarka ah".

## Qodobka 58aad
## Ajaanibka Mamnuuca ka ah Dalka.

1. Si waafaqsan Xeerkan, ajaanibka mamnuuca ka ah dalka iyo kuwa aan loo oggolayn, waxa ka mid ah kuwan: -
   b. Haddii lagu soo saaro dal ka saaris si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
   t. Haddii aanu haysan wax ku filan oo uu quuto.
   j. Haddii caddeyn dhakhtareed lagu muujiyo mid ka mid ah Cudurada la kala qaado ama cudur xagga jidhka ah oo dhinaca caafimaadka awgeed aan la oggolaan karin soo geliddiisa iyo ku negaanshihiisa dhulka Somaliland, marka loo eego nidaamka la xidhiidha caafimaadka ee ka jira dalka.
   x. Haddii uu sifo sharci darro ah uu ku soo galo dalka Somaliland isagoo aan dhukumenti sharci ah oo socdaal haysan iyo oggollaanshaha uu sharcigu sheegayo.

kh. Haddii qofka joogitaankiisa ama hawsha uu ka hayaa dhulka Somaliland ay ka soo horjeedo danta iyo nidaamka guud ee nabadgelyada qaranka, damiirka ummadda iyo diinta.

d.Haddii mar hore laga masaafuriyay oo laga saaray dalka oo aan waxba laga beddelin go'aankii hore.

r. Haddii uu ka tirsan yahay ama si uun ugu lug leeyahay hawlaha urur abaabulan oo ujeeddadiisu tahay argagixisnimo, isir nacayb ama ku hawlan falal xeerarka dalku mamnuuceen.

2. Faahfaahinta iyo caddeynta qofka ajnabiga ah ee lagu soo saarayo in aan dalka laga oggolayn waxay ku soo baxaysaa go'aanka Wasiirka Arrimaha Gudaha.
3. Xubin kasta oo ciidamada kala duwan ka tirsan marka looga baahdo meelaha aanay joogin ciidanka socdaalku waa inay ka hortagaan isu socodka sharci darada ah si waafaqsan Qodobka 13^aad^ farqadiisa 7^aad^ ee xeerkan, iyagoo u soo gudbinaya Ciidanka Socdaalka Iyo Ilaalada Xuduudaha ugu dhaw

## Qodobka 59^aad^
## Dib u Celinta Ajaanibka Mamnuuca ah ama Aan La Oggolayn

Haddii mid ka mid ah ajaanibka lagu sheegay **Qodobka 37^aad^** ee xeerkan, uu soo galo dhulka Somaliland, hawlwadeennada socdaalku waxay awood u leeyihiin inay: -

b. Ku amraan **taliyaha** ama qofka masuulka ka ah sabbeeyaha, dayuuradda ama baabuurka uu la socdo ajnabigaasi amase cidda wakiilka uga ah Somaliland inay u celiyaan ama dhoofiyaan dood la'aan meel ka baxsan dhulka Somaliland. iyadoo la saarayo isla gaadiidkii waday waqtiga ugu horeeya uguna haboon;

t. Waxaana dhammaan kharashaadka ku baxaya celinta ajnabigaasna bixinaya cidda leh ama mas'uulka ka ah gaadiidka uu waday isla markaana waxay wadajir ahaan ku qasban yihiin bixinta kharashka kaga baxay dawladda.

## Qodobka 60^aad^
## Goobaha iyo Aaggaga ka Caaggan Ajaanibka

Wasiirka Arrimaha Gudduhu wuxuu awood u leeyahay kaddib marka uu la tashado, ee ay isla gartaan Wasiirka Gaashaandhigga, inuu soo saaro qodobbo ka reebaya ajaanibka gelitaanka goobo leh soohdimo sugan oo dalka JSL ah, haddii ay u muuqdaan sababo macquul ah oo la xidhiidha dhinacyada ilaalinta nabadgelyada iyo xasilloonida iyo danaha Qaranka.

## Qodobka 61^aad^
## Degitaan Degdeg ah

1. Qofka shisheeyaha ah ee saaran gaadiidka dhulka, gaadiiska cirka iyo gaadiidka badda iyo nooc kasta oo ka mid ah gaadiidka oo ku hakada ama sii maraya dalka kuma degi karaan dalka, haddii aanay sidaas u oggolaan hawlwadeennada socdaalku.
2. Iyadoo faqradda hore sideeda ahaanayso, si waafaqsan xeerkan waa loo oggol yahay ajaanibka saaran mid ka mid ah gaadiidka lagu safro ee faqradda hore ku xusan, haddii ay dhacdo ama ay jirto xaalad degdeg ah ama culus oo degitaanka qasab ka dhigaysa sida: -

b. Arrin caafimaad.

t. Shil culus.

j. Arrin la xidhiidha bini'aadannimadda.
x. Sabab kale oo marka loo eego nidaamka safarradu oggol yihiin, si waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee socdaalka.

## CUTUBKA 4AAD
## DEMBIYADA IYO DAL KA SAARIDDA

### Qodobka 62^aad
### Dembiyada La Xidhiidha Arrimaha Socdaalka

1. Dambiyada la xidhiidha arrimaha socdaalka ee ajaanibka waxa ka mid ah: -
   b Inuu dalka sharci darro ku soo galo.
   t. Inuu been ka sheego macluumaadka khuseeya warqadihiisa socdaalka.
   j. Inuu been abuur ku sameeyo warqadaha socdaalka si loogu oggolaado inuu dalka soo galo.
   x. Inuu u hoggaansami waayo amar kasoo baxay hay'ad awood u leh oo lagu faray inuu dalka kaga baxo muddo cayiman.
   kh. Inuu mar kale sifo aan sharci ahayn oo dhuumasho ah dalka kusoo galo isagoo dalka looga saaray si waafaqsan xeerkan.
   kh. Is hortaag ku sameeyo hawlwadeen ka tirsan socdaalka ama booliska oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si uu u marin habaabiyo dhacdo ay gacanta ku hayaan.
   d. Inuu ka caawiyo qof kale oo ajnabi ah soo gelidda dalka si aan sharci ahayn.
   R. Inuu galo mid ka mid ah dambiyada xeerarka dalku ay mamnuuceen.
   d. Inuu si ku talagal ah u diido inuu ka jawaabo su'aalo, soo bandhigo dhukumentiyo la xidhiidha saxnimada arrin khuseeya isaga ama cid kale.
   s. Inuu si ku talagal ah u diido inuu tago meel loogu yeedhay.
   sh. Inuu diido inuu keeno caddaymo la xidhiidha caafimaadkiisa.
   dh. Inuu qariyo ajnabi sharci darro ku soo galay ama sharci darro ku jooga dalka.
   dh. Ku guul darraysto inuu fuliyo mid ka mid ah shuruudihii lagu siiyay oggolaanshaha soo gelidda dalka.
2. Dembi kasta oo xeerarka dalku u aqoonsan yihiin dembi xafiiska Xeerilaaliyaha Guud iyo wakiilladiisu waxay ku oogi karaan faldambiyeed, si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta.

### Qodobka 63^aad
### Been abuuridda Dhukumentiyada Dal ku galka

1. Qofka ajnabiga ah ee been abuura ama foojarigareeya mid ka mid ah dhukumentiyadiisa socdaalka si uu dalka u soo galo ama si uun ugu lug yeesha hawlo la xidhiidha been abuur dhukumentiyada socdaalka, waxa haddii ay ku caddaato uu mutaysan karaa: -
   b. Ciqaab u dhiganta heerka falka uu sameeyay.
   t. In loo diido soo gelidda dalka.
   j. In lagala noqdo oggolaanshaha joogitaanka, haddii hore loogu oggolaaday.
   x. In dalka laga saaro si waafaqsan xeerkan.
2. Waxaana dacwad Ciqaab ah oo la xidhiidha falkiisa lagaga oogayaa maxkamadda awoodda u leh, si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Qodobka 64aad**

**Amarka Dal ka Saaridda Ajaanibka**

1. Qof kasta oo ajnabi ah oo sifo aan sharci ahayn ku soo galay dalka JSL, waa laga saari karaa dalka si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
2. Saaridda ajaanibka waxa lagu soo saarayaa go'aan kasoo baxay hay'ad awood u leh si waafaqsan xeerkan.
3. Waana in go'aanka lagu caddeeyaa arrimahan:-
    b. Magaca iyo faahfaahinta qofka ajnabiga ah ee dalka laga saarayo.
    t. Sababta looga saarayo iyo waqtiga la saarayo.
    j. Habka fulinta ee loo saarayo qofka ajnabiga ah iyo;
    x. Tallaabooyinka muhiimka ah ee loo arko inay fududaynayso fulinta go'aanka.
4. Go'aanka lagu saarayo qofka ajnabiga ahi waa inuu noqdaa qoraal, laguna wargeliyaa lana gaadhsiiyaa cidda ay khusayso.
5. Waxaana amarka qofka ajnabiga ah dalka lagaga saarayo si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka soo saari kara Garsoore maxkamaddeed oo awood u leh.
6. Ajnabiga u hoggaansami waaya amarka lagu saarayo waxa waajib ah in dalka **khasab** lagaga saaro masuuliyadda dal ka saarista qasabka ahna waxa fulinya Ciidanka Socdaalka, kharashka musaafirintana waxa bixinaysa dawladda.

**Qodobka 65aad**

**Muddada iyo Fulinta Dal Ka Saaridda**

1. Muddada dal ka saarista ajaanibka si waafaqsan xeerkan waxay ka noqonaysaa muddada u dhaxaysa 24 saacadood ilaa soddon (30) cisho laga bilaabo waqtiga uu go'aanku soo baxay.
2. Haddii ay baahi timaaddo ama sabab kale oo macquul ah waa la kordhin karaa muddada dal ka saaridda, iyadoo Wasiirka ama Taliyuhu ku soo saarayo oggolaansho aan ka badnayn muddadii hore loo siiyay ama soddon (30) cisho oo dheeraad ah.

## CUTUBKA 5AAD
## BAASAABOORKA IYO WARQADAHA SOCDAALKA

**Qodobka 66aad**

**Waajibnimada Haysashada Baasaaboorka**

1. Muwaaddin kasta oo u dhashay JSL waxa uu xaq u leeyahay inuu helo baasaaboor iyo warqadaha socdaalka ee dalka si waafaqsan xeerkan.
2. Qofna masoo geli karo mana iman karo dhulka JSL, haddii aanu haysan baasaaboor ama warqadaha socdaalka oo sax ah.
3. Waana in baasaboorka ama warqadaha socdaalka ee dal kale ay yihiin kuwa buuxinaya shuruudaha looga baahan yahay si waafaqsan xeerkan.
4. Waana in ay ku caddahay nooca baasaaboorku yahay.

**Qodobka 67aad**

**Noocyada Baasaaboorka iyo Warqadaha kale ee Socdaalka**

1. Noocyada Baasaaboorrada la oggol yahay waxa ka mid ah: -

b. Baasaaboorka dadweynaha
t. Baasaaboorka ku meel gaadhka ah
j. Baasaaboorka shaqaalaha
x. Baasaboorka diblumaasiyiinta

2. Noocyada warqadaha kale ee socdaalka ee la oggol yahay waxa ka mid ah: -
   b. Warqadda socdaalka
   t. Warqadaha dal ku galka ku meel gaadhka.
   j. **Buugga badmaaxa**
   j. Xaaladdaha degdegga oo lagu soo geli karo dalka.
   x. Warqadda aqoonsiga qofka ee dal ku soo galka xaaladdo gaar ah.
   d. Noocyada kale ee warqadaha socdaalka ee si waafaqsan xeerka loo soo saaro.

## Qodobka 68[aad]
## Dalbashada iyo Bixinta Baasaaboorka & Warqadaha Socdaalka

1. Habka dalbashada iyo bixinta baasaboorrada iyo warqadaha socdaalku waa inay noqdaan kuwa waafaqsan xeerkan.
2. Waxaana waajib ah in qofka dalbanaya baasaaboorku uu u tago oo uu hor yimaaddo sarkaal ka tirsan hawlwadeennada socdaalka una gudbiyo codsigiisa si'waafaqsan xeerkan.
3. Waana in uu codsigiisa soo raaciyo: -
   b. Shahaadada dhalashadiisa.
   t. Kaadhka aqoonsiga muwaadinnimada.
   j. Shahaadada diiwaangelinta
   X. Kaadhka aqoonsiga shaqada, haddii uu ka tirsan yahay ciidamada; hadii uu shaqaale yahayna kaadhka aqoonsiga (ID) shaqada.
   Kh. Sawirrada baasaboorrada lagu dhejiyo.
   d. Haddii codsaduhu carruur ama naafo yahay u baahan taageero waa in waalid ama ilaaliye sharci ah laga helo oggolaansho qoraal ah.
   r. Bixiyo ajuurada loo qoondeeyay.
4. Kaddib hawlwadeenada socdaalku marka ay hubiyaan in la buuxiyay shuruudaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.
5. Baasaaboorka ama warqadaha socdaalka ee lagu bixiyay si waafaqsan xeerkan waa inay ku xusan yihiin xogta iyo macluumaadka looga baahan yahay.
6. Waxaana xogta iyo macluumaadka lagu qorayo baasaaboorka ama warqadaha socdaalka xaddidi doona Wasiirka Arrimaha Gudaha kaddib marka uu la tashado Ciidanka Socdaalka.

## Qodobka 69[aad]
## Ansaxnimada Baasaaboorka & Warqadaha kale ee Socdaalka

1. Baasaaboorrada caadiga ah iyo kuwa diblomaasiyiintu waxay ansax ahaanayaan: -
   b. Muddada isticmaalka ee dalalka dunida marka laga reebo dalal si gaar ah loogu sheego baasaaboorka
   t. Muddo aan ka badnayn toban (10) sannadood laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.
   j. Xaaladdaha carruurtana aanu ka badnaan karin shan iyo toban (15) sannadood laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.
2. Dalalka Jamhuuriyadda Somaliland ay heshiis ku wada jiraan waxa uu ansax ahaanayaa:-
   b. Muddada ay ku heshiiyaan dalkaas iyo JSL si waafaqsan xeerkan.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE ... SOLICITOR GENERAL OFFICE

t. Muddada uu cayimo Wasiirka Arrimaha Guduhu si waafaqsan xeerkan.

j. Muddo aan ka badnayn toban (10) sannadood laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.

x. Xaaladaha carruurtana aanu ka badnaan karin shan iyo toban (15) sannadood laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.

3. Baasaaboorrada ku meel gaadhka ahi waxay ansax ahaanayaan:-

   b. Muddada isticmaalka ee dalalka dunida marka laga reebo xaaladaha uu dalalkaas isticmaalkiisu ansax ka yahay.

   t. Muddo aan ka badnayn hal (1) sano laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.

4. Warqadaha socdaalka ee degdegga ahi waxay ansax ahaanayaan:-

   b. Ku soo gelid dalka ama dalka kale ujeeddo jid mar awgeed.

   t. Safar leh muddo cayiman.

   x. Warqadaha aqoonsiga ee ujeeddo socdaal waxay ansax ahaanayaan muddo aan ka badnayn labo (2) sannadood ah laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.

5. Warqadaha dalkugalka Ku meel gaadhka ah waxay ansax ahaanayaan:-

   b. Muddada ay ku heshiiyaan dalkaas iyo JSL, si waafaqsan xeerkan.

   t. Muddada uu cayimo Wasiirka Arrimaha Guduhu, si waafaqsan xeerkan.

   j. Muddo aan ka badnayn toban (10) sannadood laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.

6. Warqadaha socdaalka ee qaxoontinnimadu waxay ansax ahaanayaan:-

   b. Muddada isticmaalka ee dalalka dunida marka laga reebo xaaladaha uu dalalkaas isticmaalkiisu ansax ka yahay.

   t. Muddo aan ka badnayn shan (5) sanno laga soo bilaabo waqtiga la soo saaray.

## Qodobka 70[aad]

## Codsiga beddelidda Baasaaboorka & Waraaqaha kale ee Socdaalka

1. Markasta oo qofka baasaaboorka ama warqadaha socdaalku uu u baahdo in loo beddelo ama doonayo in **qayb ahaan** wax laga beddelo baasaboorkiisa ama warqadaha socdaalkiisa waa inuu qaadaa tallaabooyinkan:-

   b. **inuu asbaabaha beddelka basaaboorka ama waraaqaha socdaalka uu soo xaqiijiyo garsoore maxkamadeed oo awood u leh.**

   t. Inuu soo raaciyo baasaaboorka ama warqadaha socdaalka ee uu beddelayo.

2. Waxaana waxba kama jiraan noqonaya oo la tirtirayaa baasaaboorkii ama warqadihii socdaalka ee hore, isla marka si waafaqsan xeerkan loo soo saaro kuwa cusub.

## Qodobka 71[aad]

## Diidmada Codsiga Baasaaboorka & Warqadaha Socdaalka

1. Hawlwadeenka socdaalku wuu diidi karaa codsiga baasaaboorka iyo warqadaha socdaalka ee codsadaha haddii:-

   b. Codsaduhu aanu ahayn muwaaddin.

   t. Uu ku guuldaraysto inuu buuxiyo shuruudaha xeerkani waajibiyay.

   j. Uu bixiyo xog iyo macluumaad been ah, si uu u helo baasaaboorka ama warqadaha socdaalka.

   x. Codsigiisu aanu dhammaystirnayn.

**2.** Xaaladaha si waafaqsan faqradda hore la diido codsiga baasaaboorka ama warqadaha socdaalka waa in hawlwadeenka socdaalku muddo **afar iyo toban (14) maalmood gudahood ah** ku soo saaraa qoraal sababaysan oo caddaynaya sababta loogu diiday codsadaha.

## Qodobka 72aad

## Baasaaboor Lumay, La Xaday ama La Googooyay

1. Haddii baasaaboor ama warqadaha socdaalku lumaan ama la xado, waa in qofka iska lihi si degdeg ah u wargeliyaa Xarunta Booliska ama Xarunta Ciidanka Socdaalka ee ugu dhaw.
2. Haddii uu ku sugan yahay dalka dibaddiisa waa inuu wargeliyaa Safaaradda ama Xafiiska ugu dhaw ee JSL ku leedahay dalkaas.
3. Hawlwadeenka Socdaalka isla marka uu helo xogta lumidda ama xaditaanka baasaaboor ama warqadda socdaalka waxa uu sida ugu dhakhsaha badan ogaysiinayaa dhammaan xarumaha Ciidanka Socdaalka iyo safaaradaha ama xafiisyada JSL ku leedahay dalalka dibadda.
4. Qof kasta oo baasaaboorkiisa ama warqadihiisa socdaalku uu ka lumay, la xaday, googo'ay ama dhaawacmay waxa uu codsan karaa in loo beddelo, si waafaqsan xeerkan, isagoo bixinya ajuurada ku waajibtay.
5. Codsiga lagu sheegay faqradda 3aad waxa looga baahan yahay in qofka marka uu codsiga u gudbinayo hawlwadeennada socdaalka si loo sugo xaaladda dhabta ah ee la xidhiidha waa:-
   b. In uu soo raaciyo warqad caddayn ah oo uu ku caddaynayo xaaladda jirta.
   t. Ama waa la dhaarinayaa.
6. Haddii qofka baasaaboorka lumay, la xaday, dhaawacmay ama googo'ay uu ku sugan yahay dalka dibaddiisa waxa hawlwadeenka socdaalku u soo saari karaa kaddib marka codsigu soo gaadho baasaaboor ama warqadaha socdaalka kaddib marka la hubiyo in la dabbaqay faqradaha **4aad** iyo **5aad** ee qodobkan.

## Qodobka 73aad

## Adeegsiga Baasaaboorrada iyo Warqadaha Socdaalka ee Caddeynta Dhalashada iyo Muwaaddinnimada

1. Baasaboorku waa caddeynta ugu muhiimsan ee lagu caddeyn karo dhalashadda iyo Muwaadinnimadda haystaha, si uu u helo xuquuqaha uu ku leeyahay dalka.
2. Haysashada baasaaboorka ama warqadaha Socdaalku ma hor istaagi karaan weydiimaha, baadhitaanka ama dacwadaha garsoorka ee la xidhiidha hubinta ansaxnimadooda mar kasta oo loo baahdo.
3. **In lagu soo saaro xeernidaamiye gaar ah habka adeegsiga baasaaboorada Shaqaalaha (service passport) iyo diblomaasiga ah (diplomatic passport).**

## Qodobka 74aad

## Hakinta, Laalidda iyo Kala Noqoshada Baasaaboorka & Warqadaha Socdaalka

1. Sarkaal ama hawlwadeennada socdaalka ama sarkaal ka tirsan hay'adaha sharci fulintu waxay awood u leeyihiin in ay hakiyaan ama la wareegaan baasaaboorka ama warqadaha socdaalka haddii:-
   b. Qofkii Baasaaboorka ama warqaddaha socdaalka iska lahaa uu si u talagal ah ugu dhiibo qof kale si ay u isticmaalo.
   t. Haystaha loo soo tarxiilay ama dib loogu soo celiyay dalka, kharashkana dawladdu bixisay.
   j. Haystaha lagu xukumay si kama dambays ah dambiyada kaganacsiga maandooriyaha, lacag maydhidda, tahriibinta iyo kaganacsiga dalka, argagaxisinnimo iyo dembi kasta oo caalami ah.

x. Haystaha waaran qabasho loo jaray lagana baqayo inuu baxsado.

kh. Haystaha ay maxkamad awood u lihi ku soo rogtay xaddidaad socdaalka ah ama ay amartay in la hakiyo ama lagala wareego baasaaboorka ama warqadaha socdaalka.

d. Haystuhu si uun ugu lug leeyahay falal lagu been abuurayo ama foojari ah baasaaboor ama warqadaha socdaalka.

r. Waana in muddo aan ka badnayn **toddobo (7) maalmood** gudahood lagu baadho baasaaboorka iyo warqadaha socdaalka.

2. Sarkaalka ama hawlwadeenka socdaalku waa in hakinta ama la wareegidda baasaaboorka ama warqadaha socdaalka ee loo sameeyay, si waafaqsan faqradda **1aad** ku ogeysiiyo qoraal sababaysan qofkii iska lahaa muddo **toddobo (7) cisho gudahood ah** kuna wargeliyo inuu soo wareejiyo.
3. Kaddib marka la sameeyo ogaysiinta lagu sheegay faqradda **2aad**, haystuhu waa in muddo **kow iyo labaatan (21) cisho** gudahood ah uu ku soo wareejiyo baasaaboorka ama warqadaha socdaalka xarunta ugu dhaw ee **ciidanka.**
4. Qof kasta oo si waafaqsan xeerkan laga hakiyay ama lagala wareegay baasaaboorkiisa ama warqadahiisa socdaalka waxa uu xaq u leeyahay inuu **racfaan** ka dhan ah hakinta ama la wareegidda u gudbisto **Maxkamadda Sare.**

## Qodobka 75aad
## Baasaaboorka Caadiga ah

Shuruudaha baasaaboorka dadweynaha ee caadiga ah.

1. Warqadda codsiga oo ah ujeeddada uu baasaaboorka u qaadanayo.
2. Kaadhka dhalashada.
3. Warqadda faraha ee dembila'aanta.
4. Warqadda dembi la'aanta ee xeer Ilaalinta.
5. Laba sawir oo kur ah.

## Qodobka 76aad
## Shuruudaha Baasaaboorka Caadiga ah ee Carruurta

1. Warqadda codsiga waalidka ee ujeeddada loogu qaadayo baasaborka
2. Warqadda dhalashada ee Dawladda Hoose.
3. Kaadhka dhalashada aabbaha iyo hooyada.
4. Laba sawir oo kur ah.

## Qodobka 77aad
## Shuruudaha Baasaaboorka Shaqaalaha (Service Pasport)

1. Warqadda codsiga baasaboorka oo uu kasoo qaadanayo wasiirka ama guddoomiyaha wasaarada ama hay'adda uu ka shaqeeyo.
2. ID card-kii dhalashada.
3. ID card-kii shaqada ama Ha'yadda Shaqaalaha Dawladda
4. Warqadda faraha (C.I.D).
5. Laba sawir oo kur ah.

## Qodobka 78^aad^

## Shuruudaha Baasaaboorka Dibloomaasiga ah

**1)** Waxa qaadan kara baasaaboorka diblomaasiga ah: -

b. Madaxweynaha iyo Madaxweyna Kuxigeenka JSL

t. Xubnaha Golaha Wasiirrada.

j. Xubnaha labada Gole Baarlamaan (Guurti iyo Wakiillo)

x. Diblomaasiyiinta safaaradaha iyo qunsuliyadaha dalalka dibadda inoo jooga.

kh. Ciddii Madaxwaynuhu ugu ogolaado si waafaqsan xeerka.

2) Waxa looga baahan yahay qofka qaadanaya baasaaboorka diblomaasiga ah inuu keeno: -

b. Warqadda Oggolaanshaha baasaaboorka diblomaasiga oo ka soo baxday Xafiiska Madaxweynaha JSL.

t. Kaadhkii dhalashada muwaaddinka.

j. Laba sawir oo kur ah.

## Qodobka 79^aad^

## Waayidda Baasaaboorka (Dhammaan Noocyada Baasaboorada)

Qofka sita baasaaboorka Somaliland waxa uu ku waayi karaa waxyaabahan: -

1. Sitaha Baasaaboorka oo ay xukun kama dambays ah oo ay soo saartay maxkamad awood u lihi ku dhacay, amartayna in lagala noqdo baasaaboorka.
2. In situhu si iskii ah uga tanaasulay isaga oo codsi qoraal ah u soo gudbiyay Ciidanka Socdaalka.

   b. baasaaboorada Shaqaalaha (service passport) iyo diblomaasiga ah (diplomatic passport) in lagu waayi karo marka sitahu uu dhammaysto muddada xilka ama laga qaado xilka uu ku helay baasaaboorka.

   t. In aan faqradda sare loo adeegsanayn masuuliyiinta kala ah Madaxweynaha iyo Madexweyne Kuxigeenka hore iyo guddoomiyasha labada Gole oo xeerku siiyay maamus gaar ah, marka ay xilka ka tagaan.
3. In situhu ku kacay fal khiyaamo qaran ah.

## Qodobka 80^aad^

## Buugga Badmaaxa

Buugga Badmaaxa waxa la siin karaa: -

b. Muwaaddiniinta u dhashay Jamhuuriyadda Somaliland ee ka shaqeeya hawlaha sabbeeyayaasha.

t. Kuwa aqoonta u leh badmaaxista ee ka hawlgala goobaha dekadaha Ciidanka Illaadda Xeebaha.

## Qodobka 81^aad^

## Shuruudaha Buugga Badmaaxa

Shuruudaha bixinta buugga badmaaxa waxa ka mid ah: -

b. Warqadda oggolaansha buugga badmaaxa ee Wasaaradda Gaadiidka.

t. Kaadhka dhalashada muwaaddinka.

j. Laba sawir oo kur ah.

**Qodobka 82aad**

**Liiska Dadka saaran gadiidka kala duwan ee soo gelaya ama ka baxaya dhulka**

1. Taliyaha ama qofka masuulka ka ah sabeeye, dayuurad ama baabuur aan ahayn kuwa ciidamada ee soo gelaya Dhulka S/land waa in uu u keenaa hawlwadeenada socdaalka Liis saxeexan oo ka kooban laba nuqul oo ay ku dhigan yihiin dhamaan rakaabka shaqaalaha iyo qof kastoo kale oo saaran, isla markaana in uu bixiyo wixii war ah ee kale oo la waydiiyo.
2. Wakiilada socdaalada Badda, Cirka ama Dhulka waxaa waajib ku ah inay madaxa Xafiiska socdaalka u keenaan liis saxan oo ka kooban laba nuqul oo saxeexan kuna qoran yihiin dadka safarka ah ee saaran sabeeyaha, Dayuuradda ama gaadhiga ee ka degey ama fuulaya.
3. Taliyaha Mas'uulka ka ah sabeeyaha, Dayuuradda ama Baabuurka Ciidamada shisheeye ee soo galay dalka waxaa waajib ku ah inuu madaxa xafiiska socdaalka u dhiibo liis saxeexan oo laba nuqul ah oo ay ku qoran yihiin dadka saaran Gaadiidkaas, kuwa doonaya in ay ku degaan Dalka, kuwa doonaya in ay sii joogaan dalka iyo kuwa doonaya inay baxaan.
4. Masuulka Diyaaradda waxaa looga bahan yahay Nuqulada kala ah GD, Passanger Manifest, Crew Manifest, Cargo Manifest.
5. Masuuslka Sabeeyaha waxaa laga raba GD IMO Form 1, Crew List IMO form 5, Passenger List IMO Form 6, Stowaway List.
6. Masuulka Babuurka waxaa looga bahan yahay, Passport ama wax u dhigma, Passenger manifest Hadii uu rakab yahay.

**Qodoboka 83aad**

**Ciqaabta ku xadgudubka Xeerka**

1. Sida Xeerkani qabo qof kasta oo ku xad-gudba qodobada soo socda ama Fulin waaya waxaa loo aqoonsanayaa eedaysane, waxaanu mutaystay ciqaabta ku xusan xeerkan:-

   A) Laga helo Dhulka S/land ama meel ka baxsan, bixiya caddeyn been abuur ah ama la yimaada Dukument been abuur ah si uu u helo ama uga caawiyo qof kale si uu u helo ogolaansho sida uu qabo Xeerkani.

   B) Bedela Ogolaansho ama Dukument kasta oo la siiyo ama qoraal si waafaqsan Xeerka ama bedelka Koobigii.

   C) Siiya, ka iibiya ama u dhiibta qof kale ogolaansho ama Dukument kasta oo loo siiyey si waafaqsan Xeerka ama isticmaala ogolaansho ama Ducument kasta oo la siiyay qof kale oo magacaaban.

   D) Si ula kac ah u siiya kaalmo ama u ogolaada qofkasta oo soo gelaaya dhulka S/land ama ka baxaaya isagoo ku xad gudbaaya qodobada Xeerkan.

   E) Aan ka jawaabin ama diida in uu ka jawaabo su'aal kasta oo sharci ah ama caqli gal ah ee uu u jeediyo hawlwadeenada socdaal amase si ula kac ah u bixiya jawaab aan ku qasbanayn si waafaqsan sharciga in uu ku jawaabo su'aal u keenaysa dambi.

   F) Si ula kac ah u diida in uu iska soo xaadiriyo hawlwadeen socdaal iyadoo laga dalbay.



XAFIISKA ... OFFICIAL GAZETTE

G) Si ula kac ah u sitcmaala ama u haysta ogolaansho been abuur ah ama aan ansax ahayn ama Dukument kale oo la mid ah oo la been abuuray amase qoraalo amase isticmaala amase haysta ogolaansho la bedelay ama loo bixiyay si aan sharci ahayn.

H) Hor joogsaday hawlwadeen socdaal si uu u guto waajibkiisa.

I) Qariya ama isku daya in uu qariyo su'aalo uu u soo jeediyay hawlwadeenka socdaalku isagoo gudanaaya xilkiisa.

J) U soo gala sharci daro ama looga helo Dhulka S/land si sharci daro ah isagoo ku xadgudbay xeerkan.

K) Isagoo ah Ajnebi aan la dooneyn aanu dhawrin hawlwadeenka socdaalku sharciga ku wajahan ama Boliiska ee ku sii daaya dalka.

L) Aan dhawrin shuruudaha lagu qeexay ogolaansho kasta ee uu bixiyo Xeerkani ama qodobada nidaamiya fulinta. n) Isagoo ah Ajnebi qabta hawl laga helaayo dheef isagoo aan dhawrin ogolaanshaha uu tilmaamayo Xeerkani.

M) Qofka siiya qof Ajnebi ah shaqo isagoo aan haysan ogolaanshaha uu xeerkani tilmaamay.

N) Isku daya inuu galo dambi kasta oo keenay marka loo eego xeerkan ciqaab.

O) Sameeya fal dambiyeed isagoo u gargaaraya in la falo mid kamid ah danbiyada kor ku xusan.

P) Qofka siiya qof kale qoraal uu og yahay in uu kaga baxsanaayo danbi uu galay oo ka mid ah dunuubtaas kor lagu sheegayo.

Q) Ku xadgudubka qof kasta ee xerkan. Nuqul ay dib u qoreen Laanta Sodaalka.

2. Qofkasta oo gala danbiyada uu tilaamamayo xeerkani waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan laba iyo toban bilood (12) ama ganaax dhan Sh.SL 1200,000 (hal malyan iyo laba boqol oo kun) ama labadaba oo la isku daro ciqaabta haddii falku aanu keenin danbi aad u culus.
3. Marka qofka ku magacaaban ogolaanshuhu galo mid ka mid ah danbiyada ku xusan xubinta hore ee qodobkan, Garsoorka ka sokow Ciqaaabta uu saarayo wuxuu amri karaa kala noqosho ogolaanshaha uu haysto.

## Qodobka 84aad
## Ciqaabta saaran Ajnebiga

Ciqaabta saaran Ajnebiga la saaray ee soo galay Dhulka Somaliland.

1. Ajnebiga laga saaray dhulka S/land si waafaqsan Xeerkan ee dib u soo gala dalka iyadoo go'aankii ka saaritaanku ansax yahay, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan falku dhisayn danbi aad u culus xadhig ilaa (3) saddex sanno ama ganaax dhan ilaa 3000,000 Sh.SL (Sadex malyan) ama labadaba, dibna waa loo eryayaa.

## 85aad
## Ciqaabta saaran Mulkiilaha, Wakiilka ama Qofka Masuulka ka ah Sabeeyaha iyo Dayuuradda

Marka Ajnebiga aan la dooneyn soo galo dhulka S/land isagoo ku yimaad sabeeye iyo Dayuurad iyadoo qofka mulkiilaha ama Wakiilka ama qofka masuulka ka ah sabeeyaha iyo Dayuurada aannu war ka hayn, markaas oo kale mulkiilaha, wakiilka ama qofka masuulk a ka ah waxaa lagu ciqaabayaa mid kasta gaar ahaantiisa hadii aanu falku keenayn danbi aad u culus ganaax dhan S/land Shiling 30,000,000 (sodon malyan).

Qodobkan lagu dhaqi maayo marka aan Ajnebigaasi aan la dooneyn haysto ogolaansho ansax ah oo lagu bixiyay si waafaqsan Xeerkan.

**Qodobka 86aad**
**Hab-raaca Ciqaabaha**

Hab-araaca dambiyada ka dhasha Xeerkan ee aan lagu jidayn ciqaabihiisa xeerka waxa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta Guud iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

**Qodobka 87aad**
**Samaynta Warqadaha Safarka ee degdegga ah**

Ciidanka Socdaalku wuxuu awoodaa inuu sameeyo warqadda safarka degdegga ah ee qofka ajaanibka oo ka dhacay ama ka lumay sharcigii uu dalka ku joogay, kaas oo aan dalka ku haysan safaarad ama qunsuliyad u samaysa warqadda safarka, Ciidanka Socdaalku wuxuu bixin karraa warqadda safaraka degdegga ah.

1. Warqadda safarka degdegga ah waxa lagaga bixi karaa dalka inta ay shaqaynayso, lagumana soo noqon karo.
2. Warqadda safarka degdegga ah ma shaqanayso wax ka badan 30 cisho maalinta la soo saaro.
3. Safaaradaha ama qunsiliyadaha Jamhuuriyadda Somaliland ee dalka dibaddiisa waxay soo bixin karaan warqadda safarka degdegga ah, iyaga oo soo siinaya muwaaddiniinta JSL ee ku sugan waddanka dibaddiisa.

**Qodobka 88aad**
**Warqadda Dal ku noqoshada**

Warqadda safarka waxa soo saari kara Ciidanka Socdaalka iyaga oo siinaya dadka dalkooda ku laabanaya ee aan haysan sharci ay ku joogaan dalka, kuna laabanaya waddankooda.

## CUTUBKA 6AAD
## QODOBBO KALA DUWAN

**Qodobka 89aad**
**Xeernidaamiye**

Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeernidaamiye lagu dhaqangelinaayo xeerkan oo baahi weyn loo qabay maaddaama aanu hore u jirin xeer noocan oo kale ah, isla markaana ay lagama maarmaan tahay dhaqangelinta xeerkani.

**Qodobka 90aad**
**Wadashaqaynta iyo Iskaashiga**

Ciidanka Socdaalku waxay wadashaqayn iskaashi buuxa ah la yeelanayaan: -

b. Dhammaan hay'adaha dawliga ah ee si uun saamayn ugu leh hawlaha socdaalka.
t. Hay'addaha Qaramada Midoobay, kuwa caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee si uun ugu lug leh hawlaha socdaalka, iyadoo heshiis isfahan oo waafaqsan xeerkan lala geli karo oo ay ku wada shaqeeyaan.

## Qodobka 91^aad
## Kaabista iyo Wax ka beddelka Xeerka

Xeerkan waxa lagu samayn karaa kaabis iyo wax ka beddel, mar kasta oo loo baahdo isla markaana ay u muuqata lagama maarmaan.

## Qodobka 92^aad
## Fasiraadda Xeerka

Xeerkan waxa loo fasirayaa, si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka JSL, xeerarka kale ee dalka iyo sharciyada iyo baaqyada caalamiga ah ee la xidhiidha hawlaha socdaalka.

## Qodobka 93^aad
## LAALIS

Isla marka xeerkani dhaqangal noqdo, waxa uu burinayaa xeerarka ay ka mid yihiin Xeerka Socdaalka (**Xeer Lr.7 2/1995**) ama wareegto kasta ama xeer kasta oo ka horreeyay oo khilaafsan xeerkan.

## Qodobka 94^aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan golayaasha xeerdajintu isla markaana uu saxeexo Madaxweynaha JSL, laguno soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL**

**Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**